## SHARCIGA HEER QARAN EE XIRIIRKA GUUD EE SHAQAALAHA

Sidoo kale cuskanaya NLRA ama sharciga Qaranka; 29 U.S.C. §§ 151–169
[Ciwaanka 29, Cutubka7, Cutubka QaybtiisaII, Sharciga Dalka Maraykanka]
NATIIJOOYINKII IYO DHAQAN GELINTA SHARCIGA

**Sharciga nambarkiisu yahay1. [§ 151.]** diidmada ay diidayaan qaar ka mid ah loo shaqeeyayaashu xuquuqda ay shaqaaluhu u leeyihiin inay ururo samaystaan iyo diidmada ay qaar ka mid ah loo shaqeeyayaashu ay diidan yihiin inay aqbalaan waxyaalaha shaqaalaha u ogolaanaya inay si wada jir ah ula xaajoodaan loo shaqeeyaha kaasoo isla markaana u ogolaanaya shaqaalaha inay samayn karaan shaqo joojin rabshado iyo waxyaalaha kale oo keeni kara dhibaato soo gaadha goobaha shaqada kuwaas oo looga golleeyahay in culays lagu saaro goobaha ganacsiga kaasoo keenaya (a) inla hakad la geliyo habsami u socodka iyo nabad gelyada alaabta ganacsiga (b) isla markaana hakad gelinta la sameeyo saacadaha ganacsiga dhexdooda (c) kaasoo saamayn wayn ku yeelanaya joojinayana ama yaraynaya isu socodka alaabta qaydhiin ama alaabooyinka la warshadeeyay kuwaas oo ka imanaya ama u socda ilaha ganacsiga isla markaana wax u dhimaya qiimaha alaabta ee suuqa ganacsiga ; ama (d) kaasoo keenaya hoos u dhac ku yimaada shaqaalaynta iyo mushaharka ilaa ay gaadho xad ay si wayn u hakad geliso badeecad is waydaarsiga suuqa ganacsiga .

Isu dheelitir la’aanta awooda lagu wado xaajoodo ee u dhaxaysa shaqaalaha aan haysan xoriyad buuxda oo ay urur shaqaale ku samaysantaan ama xoriyad dhab ah oo ay qandaraas ku saxiixdaan iyo kuwo wax shaqaaleeya ee leh shirkadaha waawayn ama ururo ganacsi oo ay ku midaysanyihiin kaasoo si wayn culays u saaraya isu socodka ganacsiga ahna mid ay ugu tala galeen in lagu sii xumeeyo xaalada ganacsiga iyo habsami u socodka wax kala gadashada isla markaana yaraynaya mushaharka shaqaalaha iyo awooda wax gadasho ee shaqaalaha muruq maalka ah waxaa kale oo ay ka hor tegayaan in ay hirgasho tartan mushahar bixinta ah oo dhexmara shirkadaha iyo in lawanaajiyo xaaladaha goobaha aay shaqaaluhu ka shaqeeyaan.

Waayo aragnimadu waxay sicad inoo tusayaan in sharcigu difaaco xuquuqda shaqaalaha ee ay ka midka yihiin inay urur shaqaale samaystaan, iyo inay siwada jir ah ula gorgortamaan loo shaqeeyayaasha inay ka ilaalinayso inuu ganacsiga ku yimaaddo,waxyaalaha ay ka midka yihiin burbur, dhaawac,ama inuu hakad gallo, waxaa kale oo dhiiri gelinaya habsami u socodka ganacsiga in laga saaro dhowr qodob oo deganaansho la’aan ku keena shaqada warshadaha isla markaana la dhiiri geliyo waxyaalaha keenaya in si saaxiibtinimo iyo wada shaqayn ay ku jirto loo xaliyo khilaafyada ka kaca mushaharka , saacadaha shaqada iyo xaaladaha kale ee shaqada laxiriira. Waxaa kale oo iyaduna jirta sida waaya aragnimadu ina tusayso in marka awood is le’eg lasiiyo shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha in qaar ka mid ah ururada shaqaalaha saraakiishooda iyo xubnahooda kalaba inay isku dayaan inay culays saaraan shirkadaha iyagoo isku deyaya inay joojiyaan ama ay hakiyaan habsami u socodka hawlaha ganacsiga iyagoo isticmaalaya waxyaalo ay kamid yihiin shaqo joojin iyo waxyaalo kale oo khalkhal gelinaya hawlaha ganacsiga taas oo isla markaana wax u dhimaysa habsami u socadka badeecaddaha iyo danta guud ee dadwaynaha. Sidaa darteed joojinta falalka noocan ahi waxay arin muhiim u yihiin si loo hubiyo hirgelinta iyo ilaalinta xuquuqaha kale ee sharcigani balanqaaday.

Waxaa lagu dhawaaqay inay tahay sharciga dalka maraykanka in la tirtiro waxyaalaha keenaya hakad wayn oo gala habsami u socodka badeecadaha. Isla markaana la fududeeyo lana joojiyo marka ay dhacaan waxyaalaha keena joogsashada badeecada

**SHARCIGA HEER QARAN EE XIRIIRKA GUUD EE SHAQAALAHA**
Iyadoo la dhiiri geliyo hab dhaqamo iyo nidaamyo kuwaas oo si wadajir ah looga wada xaajooday lanna difaaco xuquuqda buuxda ee ay shaqaaluhu u leeyihhiin inay samaystaan ururo ay iyagu u madax banana yihiin kuwaas oo ay ku dooran karaan dad matala iyadoon cidkale soo fara gelin taas u jeedada ka dambaysaa ay tahay inay samaystaan dad ay iyagu doorteen oo matala goobaha lagaga wada xaajoonayo xaaladaha la xidhiidha shaqada iyo shaqaalaha iyo waxyaalaha kale ee la xidhiidha difaacidda xuquuqda shaqaalaha.

ERAY BIXIN( QEEXITAAN )

**QAYBAT. 2. [§ 152.]** marka lagu adeegsado sharcigan dhexdiisa [cutubka hoosaad]—
(1) eryga "qof" wuxuu u taagan yahay hal qof ama dad badan ururada shaqaalaha iskaashatooyinka ganacsiga, shirkadaha waawayn wakkiilka sharciga, dadka lagu aaminay kiisaska hoos imanaya qodobka 11 ee sharciga maraykanka [ciwaanka 11 hoostiisa ] ama helayaasha.
(2) erayga "looshaqeeye" wuxuu u taagan yahay qofkasta oo matalaya loo shaqeeye sitoos ah ama si dadban laakiin maaha inloo adeegsado dawladda maraykanka ama shirkadaha ay dawladda maraykanku leedahay ama bangiga kaydka ee ay dawlada dhexe ee maraykanka ama gobolkasta ama qayb ka mid ah xisbi siyaasadeed kasta ama qofkasta oo hoos yimaada sharciga shaqaalaha wadooyinka Tareenada[45 U.S.C. § 151 et seq.],sharcigaas oo ah mid mar walba wax laga badalo ama urur shaqaale kasta (waxa aan ka ahayn marka uu matalayo loo shaqeeye ) ama qofkasta oo matalaya ilaa heer sarkaal ama wakiil urur shaqaalaha noocaas oo kale ah [Waxaa la daabacay. L. 93–360, § 1(a) luulyo 26. 1974. 88 Stat.395 odhaah la tirtiray "ama shirkad kasta ama urur ka hawlgala isbitaal ama hadii qayb ka mid ah dadka lacagta helayaa ayna ka faa' iidaysanin iyagoo qaadanaya faa' iidadii shakhsiyaadka ay shirkadda lacagtu ugu jirto" kaas oo ka yimid qeexitaanka erayga "looshaqeeye."]
(3) erayga "shaqaale" waa inuu yahay eray qofkasta oo shaqaala ahi u sheegan karo waa in uuna noqon eray u khaas ah shaqaale ka shaqeeya hal shirkad keliya hadii uuna sharciga [cutubkan hoosaadkan] sicad u sheegaynin wax ka duwan waa inuu magacan qaadankaro qofkasta oo shaqadiisa loo joojiyay sabab la xidhiidha is afgaranwaa ka dhextaagan wakhtigan xaadirkaa ee lagu jiro shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha ama ka dhashay xuquuqda shaqaalaha oo lagu xad gudbay qofkaas oon weli helin shaqadiisii shaqo u dhiganta laakiin waa inaan lagu darin shaqaalaha ka shaqeeya beeraha ama qof ka shaqeeya guri dhexdii ha u shaqeeyo qoys ama shakhsi gurigiis ama waxaa kale oon isaguna sharcigan hoos imanayn qofkii u shaqeeya waalidkii ama labada qof ee is qaba oo midkood midka kale u shaqeeyo ama qofkasta oo iskii si madax banaana u shaqaysta,ama qofkasta oo loo shaqaaleeyay inuu shaqaale madax u noqdo,ama qofkasta oo hoos yimaada sharciga shaqalaha Tareenada [45 U.S.C. § 151 et seq.], sharcigan oo markasta wax laga badalo ama qofkasta oo aan shqadiisa halkan lagu cadayn.
(4) Erayga "wakiil" waxaa uu u taaganyahay qofkasta ama urur shaqaale kasta .
(5) Erayga "urur shaqaale" macnihiisu wuxuu yahay urur kasta noocuu doonaba ha ahaadee ama wakaaladkasta ama gudi wakiil ka ah shaqaale ama qorshe kaas oo ah mid ay shaqaalahu ka qayb qaataan ahna mid u ku dhisan sababo macquul ah dhamaan ama qayb ka mid ah, ahna mid ka shaqeeya danaha shaqaalaha dhegaystana cabashooyinkooda sida khilaafyada u dhexeeya shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha kuwaas oo aay ka mid yihiin khilaafka mushaharka, saacadaha shaqada ama xaaladaha la xidhiidha goobta shaqada.

(6) Erayga “ganacsi” macnihiisu waa wax kala gadasho,wax kala badalasho,gaadiid ama isgaarsiin ka dhaxaysa dhawr gobol ama degmada Columbia iyo maamul ka mid ah maamulada madaxa banaan ee hoos yimaada dawlada maraykanka ama meel kasta oo ka tirsan gobolada wadanka maraykanka ama ka dhexeeya gobol maraykan ah iyo dal kale oo shisheeye ama qayb ka mid ah gobol maraykan ah iyo wadan shisheeye ama wadan shisheeye iyo degmada Columbia ama degmada Columbia dhexdeeda,ama maamulada madaxa banaan ee hoos yimaada dawlada maraykanka iyo degmada Columbia ama ganacsi u kala socda gobol dhexdiis laakiin sii dhexmaraya gobol kale ama degmada Columbia iyo wadan shisheeye .
(7) Erayga “waxyaalaha ganacsiga taabanaya” wuxuu u taaganyahay waxyaalaha waxyeeleeya,ama hakad geliya ganacsiga ama culays saaraya ama hor istaagaya ama wax u dhimaya inuu ganacsigu si xor ah u socdo ama iskudaya ama keena inuu dhibaateeyo is afgaranwaa dhexmara shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha taas oo waxa looga golleeyahay ay tahay in culays la saaro ama la joojiyo habsami u socodka hawlaha ganacsiga.
(8) Erayga “cadaalad daro lagula kacay shaqaalaha”wuxuu macnihiisu yahay noockasta oo cadaalad daro ah oo shaqaalaha lagula kaco kaas oo lagu qoray qaybta 8daad ee sharciga [qaybta 158daad ee ciwaankan].
(9) Erayga “is afgaranwaa u dhexeeya shaqaale iyo loo shaqeeye” waxaa ku jira oo uu koobayaa noockasta oo khilaaf ah oo la xidhiidha jago ama dalacsiin,xaaladda goobta shaqada ama laxiriira ururada shaqaalaha,ururada kale ee dadku ku midoobaan iyo wakiilada matalaya qof wadahadal kula jira looshaqeeye kaasoo looga danleeyahay in lasugo la ilaaliyo,ama labadalo xaalada qofkaas,ama la raadiyo sidii laysugu duboridi lahaa xaaladaha ama heshiisyada ay shaqaaluhu ku shaqaynayaan.Iyadoon la eegayn in waxa laysku khilaafsanyahay uu yahay mid xidhiidh dhow la leh shaqaalaha ama loo shaqeeyaha.
(10) Erayga “gudiga heer qaran ee xidhiidhka guud ee shaqaalaha” wuxuu qeexayaa ama u taaganyahay gudiga heer qaran ee xidhiidhka guud ee shaqaalaha kaas oo lagu xusay qaybta 3aad ee sharcigan [Qaybta 153aad ee ciwaankan].
(11) Erayga “kor kala socde” wuxuu qeexayaa ama macnahiisu yahay qofkasta oo awood leh kaasoo u shaqaynaya ilaalinayana danaha loo shaqeeyaha isla markaana leh awood uu wax ku shaqaalaynkaro, ku badali karo qofka,si ku meel gaadh ah shaqada kaga fadhiisinkaro ,kaga eryi karo, ku soo celinkaro shaqada qof laga eryey,ama si aan joogto ahayn shaqada uga maqnaa,qof dalacsiinkara,shaqo khaas ah u diri kara, abaal marin bixin kara,ama ganaaxi kara shaqaalaha, u diri kara, ama si xilkasnimo leh u maamuli kara ama cabashooyinkooda xalinkara ama si buuxda ugu talinkara in xaalad wax laga qabto,hadii ayna xaaladaa ahayn mid hore u soo martay,ama aanay ahayn xaalad caadi ah oo qof walba xukunkeeda garankaro taas oo ah mid u baahan qof si xor ah u fakara oo go’aan sidaa ku gaadha.
(12) Erayga “shaqaalaha xirfadlayaasha ah” wuxuu qeexayaa ama u taaganyahay—
(a) shaqaale kasta oo shaqeeya kaasoo oo ah (i) sida ay u badantahay qof waxbartay ahna mid u shaqeeya si ka duwan dadka kale ee aan waxbaran marka laga eego dhinaca,maskaxda,shaqooyinka gacanta laga qabto,kuwa qalab la adeegsado iyo kuwa xooga u baahanba.,,; (ii)kuwaas oo ah kuwo la doonayo inuu qabto qof leh xirfad laysku halaynkaro iyo taxadar dheeraad ah lehna awood uu go’aan fiican oo shaqada ku wanaajinayo (iii) Tilmaamahaas noocan ah oo ah kuwo waxbarashadu keentay ama natiijadii ka soo baxday lama barbardhigi karo lagumana qiyaasi karo wakhtiga ay qaadatay in shaqadaa laqabtay..; (iv) kuwaas oo u baahan aqoon, qoontaas oo ah mid aad u heersaraysa oo ah cilmiga sayniska laamihiisa ama in loo barto si caadi ah iyadoon qofku dugsi tegin laakiin uu aqoontaa ka bartay la shaqayn uu mudo dheer la shaqaynayay qof dugsi uga soo baxay ama inuu waxka bartay

machadyada culuunta sare bixiya ama isbitaalo ku waas oo ka soocan kana heer sareeya dugsiyada caadiga ah ama qof shaqada ku bartay la shaqayn uu la shaqeeyay qof xirfadleh ama cilmi lagu bartay tababar, tababarkaas oo ah mid qofka loo tababaray maskaxiyan iyo sida gacanta wax looga qabtaba ama sidii uu xoogiisa u isticmaalayo (b) ama "shaqaale kasta" kaasoo, (i) ka qalinjabiyey dugsi isagoo ku takhasusay cilmi gaar ah isla markaana bartay aqoon gaar ah sida kuc ad lifaaqa (iv) ama qayb muhiim ah (a), iyo (ii) isagoo qabanaya shaqadaa,shaqo laxiriira ama u dhow,isla markaana korka uu ka fiirinayo qof kale oo isagu shaqada ku takhasusay.

**SHARCIGA HEER QARAN EE XIRIIRKA GUUD EE SHAQAALAHA**

Isla markaana uu sidaa ku noqda qof shaqada si wanaagsan u yaqaana, kadibna qaato darajada ah shaqaale xirfadle ah sida lagu cadeeyay qoraalka lambarkiisu yahay (a).

(13) Hadii la doonayo inla ogaado inuu qof "wakiil ka yahay" qof kale wax kasta uu sameeyana uu mas'uul ka yahay qofka uu wakiilka ka yahay su'aalaha ka iman kara oo ah in falal khaas ah oo uu sameeyay ay yihiin kuwo uu ogolaaday qofka uu matalayey waa inaan lagu degdegin go'aan ka gaadhista arintaas.

(14) Erayga "urur daryeel caafimaad" waa inuu macnihiisu u taaganyahay isbitaalkasta,sida isbitaalada dadka lagu baxnaaniyo, shirkadaha ka shaqeeya dayactirka isbitaalada iyo qalabka isbitaalada rugaha caafimaad ee bukaan socodka,guryaha dadka waawayn lagu hayo,ama meelaha mudada dheer dadka lagu daweeyo,ama meel kasta oo ka shaqaynaysa dawaynta dadka jiran iyo dadka duqaytidaa. [waxaa la daabacay. L. 93–360, § 1(b), Luulyo 26, 1974, 88 Stat. 395, waxaana lagu daray inaa in le,eg.

GUDIGA SARE EE HEER QARAN EE XIRIIRKA GUUD EE SHAQAALAHA

**Qaybta. 3. [§ 153.] (a) [Dhisida gudiga, Qaybaha uu ka koobnaanayo, Magacaabidooda, iyo Dalacsiintooda; magacaabida Gudoomiyaha; Shaqo ka qaadista Xubnaha ]** Gudiga Heer Qaran ee Xidhiidhka Guud ee Shaqaalaha" (Intii la sameeyay qoraalkan loogu yeedho "Gudiga sare") ee uu sharcigani sameeyay [cutubka hoosaadkan] ka hor intii wax laga badalay sharciga maaraynta xidhiidhka guud ee shaqaalaha , 1947 [29 U.S.C. § 141 et seq.], Hay'adani waxay jirtay iyadoo ah hay'ad ka tirsan dawladda maraykanka ,marka laga reebo in gudiga laga dhigay shan meeshii uu ka ahaan jiray sedex,kuwaas oo uu madaxwaynuhu magacaabo isagoo latashanaya golaha baarlamaanka ogolaanshana waydiisanaya,markaan eegno labada xubnood ee lagu soo daray mid ka mid ahi wuxuu shaqaynayaa mudo shan sano ah,halka midka,ka shaqaynayo labo sano oo keliya,markaa kuwa badalaya labadan xubnood ee lagu soo daray iyo sedexda xubnood ee kalaba waa in lamagacaabo oo ay shaqeeyaan mudo shan sano ah ,laakiin hadii uu shaqada ka tago mid ka mid ah gudiga qofka lagu badalayaa wuxuu shaqaynayaa oo keliya mudada u hadhsanayd qofka uu badalayo. Waxaa kale oo la rabaa inuu madaxwaynuhu ka dhex doorto gudiga qofka gudiga gudoomiyaha u noqonaya.waxaa kale oo uu madaxwaynuhu awood u leeyahay inuu shaqada ka qaado xubnaha gudiga isagoo ogaysiinaya dacwadna ku soo oogaya eedayn taasina waa inay ay noqoto mid ku saabsan inuu gudigaas shaqadiisii ka soo bixi waayey ama uu si khalad ah u isticmaalay awooda xafiiskiisa ama uu ku kaco falal uu ku lumiyo kalsoonida dadwaynaha.,laakiin majiro wax kale oo shaqada lagaga qaadi karaa.

**(b) [Awoodsiin,awood lasiiyo xubnaha gudiga iyo maamulayaasha goboladda ; kadibna uu gudigaa la doortay dib u fiiriyo wixii u baahan inla badalo iyo wixii u baahan in sidiisa lagu sharciyeeyo ]** Gudiga waxaa awood loo siiyey inuu awooda oo dhan ama qayb ka mid ah siinkaro koox ka kooban sedex ama xubno intaa ka badan, awoodaas oo ah mid ay xubnaha la siiyey adeegsan karaan. Waxaa kale oo gudiga awood loo siiyey inuu awoodiisa siin karo maamulayaashooda goboladda taas oo ku cad qaybta 9aad ee sharciga [qaybta 159aad ee ciwaankan]si loo go'aamiyo inay kooxdu tahay mid ku haboon shaqada loo dirayo oo ah in gorgortano wadajir ah la galo, in baadhitaan lagu sameeyo isla markaana dacwadda la dhegaysto,iyo in la ogaado inay jirto su'aal ka taagan wakiilada iyo inkale iyo in la qabto doorasho ama la qaado cod qarsoodi ah taas oo ku qoran sharcigan qaybtiisa ,(c) ama (e) ee qaybta 9aad [qaybta 159aad ee ciwaankan] iyo in natiijada la sharciyeeyo marka laga reebo hadii uuna qofka dacwadu ku socotaa si degdeg ah codsi rafcaan ah ugu gudbin gudiga sare. Waxaa kale oo laga yaabaa inuu gudigu dib u eego, falka maamulayaasha goboladda kuwaas oo ah kuwa awoodooda ku hoosjira, sida sharcigani dhigayo, laakiin maaha in dib u eegidan la sameeyo hadii uuna si khaas ah gudiga sare amarkan u bixinin,waxayna shaqadu u soconaysaa sidii ay maamulayaasha goboladdu u wadeen shaqadooda . Booskaa laga baxay waa inaana wax dhibaato ah u gaysan xuquuqda xubnaha kael ee soo hadhay,waa inayna luminin wax awood ah adeegsan karaana dhamaan awooda gudiga sare. Markastana sedex xubnood oo gudiga ka mid ahi waa inay ahaadaan gudiga khaaska ah ee gudiga sare,labadaa xubnood ee soo hadhay waxay noqonayaan gudi khaas ah oo loo qaybiyey inay daba galaan hubiyaana meel marinta xukun kasta oo koox lagu soo rogay. Waxaa kale oo waajib ah inuu gudigu leeyahay calaamad la yaqaano oo sharci ah qofkastana arki karo.

23 0

**(c) [Warbixinta sanad laha ah ee la siinayo baarlamaanka iyo madaxwaynaha]** gudigu waa inuu dhamaadka sanad kasta diyaariyo warbixin qoraal ah oo loo diro madaxwaynaha iyo baarlamaanka ,warbixintaa oo la rabo inay si wayn ugu soo koobaan kiisaskii waawaynaa ee ay ka shaqeeyeen iyo wax qabad koodii sanadka. **(d) [Golaha guud ee Wadatashiga; magacaabistiisa iyo mudada uu xilka haynayo;Awoodiisa iyo shaqadiisa ; markuu boos banaanaado ]** waa inuu jiro golaha guud oo wadatashi kaas oo ay tahay inuu madaxwaynuhu magacaabo,isagoo la tashanaya baarlamaanka waydiisanayana ogolaanshahooda,mudada ay shaqaynayaana waxay noqonaysaa afar sano .Golaha guud ee wadatashi waa inuu korka kala socdo dhamaan garyaqaanada uu gudigu shaqaaleeyey (waxaan ka ahayn maamulka qaaliyada sharciga iyo kalkaaliyaasha sharciga ee xubnaha gudiga) iyo saraakiisha iyo shaqaalaha xafiis goboleedyada. Mida kale, goluhu waa inuu leeyahay awooda go'aan gaadhista ee ugu dambaysa, isagoo wakiil ka ah gudiga sare, arimaha la xiriira baadhitaanada xukun ridida iyo wax yaalaha kale ee la xidhiidha sharci jabinta isagoo cuskanaya qodobka 10aad ee sharciga [qaybta 160aad ee ciwaankan],iyo inla ixtiraamo dacwad ku oogida sharci jebinta noocaas oo kale ee laqaadayo intaan gudiga sare loo gudbin.Waxaa kale oo larabaa inuu goluhu qabto shaqooyinka kale ee gudigu u diro ama sharcigu u ogolyahay inay qabtaan. Hadii uu boos kabanaanaado xafiiska golaha guud ee wadatashgai madaxwaynaha ayaa awood u leh inuu u magacaabo sarkaal ama qof shaqaale ah oo matala golaha guud ee wadatashi mudada kursigani banaan yahay,laakiin madhicikarto inuu qof ama dad badan oo loo magacaabay booska,ama boosaska banaanaaday, (1) ay shaqeeyaan mudo ka badan afartan maalmood wakhtiga baarlamaanku shaqaynayo ee aanu fasaxa ku maqnayn hadii uuna qofka musharaxa u ah booskan aan loo gudbinin aqalka sare ee baarlamaanka (2) kadibna aan dib loo dhigin magacaabista sababtuna ay tahay diidmo ay

diideen qaarka ka mid ah xubnaha aqalka sare ee baarlamaanka magacaabistaa musharaxan ee la soo gudbiyay.
[Ciwaanka ah "maamulka qaadiyada sharciyaqaanka ah" waxaa la meel mariyay 5 U.S.C. § 3105.]

**qaybta. 4. [§ 154. Siyaalaha lagu kasbado in markale la magacaabo; saraakiisha iyo shaqaalaha ; iyo sida loo bixinayo kharashyada baxa]** (a) Xubinkasta oo ka mid ah gudiga sare iyo gudiga maamula golaha guud ee wadatashi waxay xaq u leeyihiin in markale lama gacaabo waxaa iyagana laga rabaa inayna habayaraatee wax kale soo dhexgelinin sida shaqo kale oo khaas u ah.Waxaa kale oo larabaa inuu gudigu magacaabo xoghayn guud, iyo garyaqaano noqda kuwo wax qiimeeya, maamul goboleedyo iyo shaqaalaha kale ee laga yaabo in wakhtiyada qaarkood loo baahdo si ay si wanaagsan ugu qabtaan shaqooyinka markaa loo baahanyahay. Waxaa laga rabaa inayna gudigu shaqaalayn garyaqaano, iyadoo sababta loo shaqaalaynayaana ay tahay inay dib u eegaan qoraalada dacwadaha, ama ay u diyaariyaan qoraalo ah sida ay arinta u arkaan, marka laga reebo hadii garyaqaanka loo shaqaaleeyay inuu u shaqeeyo sidii kakaaliye sharci oo kale isagoo u shaqaynaya xubnaha gudiga, waxaase la doonayaa inay xubnaha gudigu iyagu dib u eegaan qoraallada dacwadaha ay diyaarsadaana qoraaladooda. Looma ogola qof aan ka tirsanay gudiga sare ama aan ahayn kalkaaliyihiisa xaga sharciga ee maamulka qaaldiyada sharciyaqaanada inuu dib u eego warbixinta ay qoraan maamulka qaaliyada sharciyaqaanadu marka uu qoraalku soo baxo iyo intuuna soo bixinba Waxaa kale oon iyadana la ogolayn in xubin ka tirsan maamulka qaaliyada sharciyaqaanadu inuu wax talo ah ama wada tashi ahi oo ku saabsan go'aamada uu qaatay ama talo soo jeedin uu sameeyay la wadaago xubnaha sare ee gudiga.

## SHARCIGA HEER QARAN EE XIRIIRKA GUUD EE SHAQAALAHA

Gudiga sare waxaa laga yaabaa inuu dhiso ama abaabulo hay'ado ah heer gobol, heer degaan, ama hay'ado kale isagoo u dhisaya si iskaa wax u qabso ah oo aan wax lacag ah la siinayn dhisayana wakhti kasta intii ay dhisi karaan ee markaa loo baahanyahay. Garyaqaanada lagu magacaabay sharcigan aan kor ku soo sheegnay, waxaa laga yabaa inay matalaan gudiga sare iyagoo raacaya tilmaamaha gudiga sare kadibna waxay tegi karaan maxkamada horteeda iyagoo ka wakiil ah gudiga sare qaadanayana kiisaska gudiga.Majirto qayb sharcigan ka mid ah [cutubka gudihiisa] oo odhanaysa ama ogolaanaya inuu gudigu sare magacaabo shakhsiyaad iyadoo sababta loo magacaabayaa ay tahay si loo dejiyo colaad ama magacaabida la sameeyo iyadoo qof lagu raali gelinayo ama qiimayn xaga dhaqaalaha ah darteed.
[Ciwaanka ah "maamulka qaaliyada sharci yaqaanadaa"waxaa lagu sharciyeeyay sharcigan dhexdiisa 5 U.S.C. § 3105.]
(b) Dhamaan kharashyada ku baxa gudiga sare marku lagu daro kharashyada safarada muhiimka ah iyo kuwa cuntada iyo wixii la xiriira ee ka baxsan degmada Colombia kharash kaas oo ah mid ay galeen shaqaalaha gudiga sare iyagoo haysta amarka gudiga sare waa in la ogolaado oo la bixiyo waxaase shaqaalaha laga rabaa inay la yimaadaan cadaymo ay ka mid yihiin risiido ka dibna waxaa la rabaa inuu gudigu ama qofka shaqadan loo xilsaaray in loo saxiixo bixinta kharashka

**Qaybta. 5. [§ 155. Xafiiska wayn ee Rasmiga ah, ee sameeya Baadhitaanada Xaqiiqo Raadinta ee Wadanka oo dhan Waxaa go'aan gaadhista iyo Xaqiiqo raadintaba ka qayb qaata Xubin ka tirsan Gudiga sare.]** Xafiiska wayn ee gudiga sare waa inuu ku yaalaa Degmada Columbia. Laakiin gudigu meel walba waa ay ku kulmi karaan awoodiisuna meelkasta way gaadhsiisan tahay. Waxaa kale oo gudigu samayn karaa in xubin ama xubno ka

tirsan gudiga ama hay'ad ama hay'ado uu u xil saari karo dawcad ku soo oogida iyo baadhitaan xaqiiqo raadin ah ee lagu samaynayo kiisaska la xidhiidha shaqadooda meel kasta oo ka tirsan wadanka maraykanka. Isla markaana xubnaha ka qayb qaata baadhitaanadaa xaqiiqo raadinaa waa in aan loo diidin inay ka qayb qaataan go'aan ka gaadhida kiisaska ay soo baadheen marka gudiga sare go'aaminayo**. Qaybta. 6. [§ 156. Sharciga iyo sharciyaynta]** Gudiga sare waa inuu lee yahay awood uu wakhtiyada qaarkood sharciga ku badali karo isagoo raacaya sharuudaha maamulka sharci dejinta taas oo ku qoran [Cutub hoosaadkaII ee cutubka 5aad ee Ciwaanka 5aad] sharcigan iyo sharciyayn taasi waxaa laga yaabaa inay muhiim u yihiin fulinta waxyaalaha khaaska ah ee sharcigani xambaarsanyahay [cutub hoosaad].

XUQUUQDA SHAQAALAHA

**Qaybta. 7. [§ 157.]** Shaqaaluhu waxay xaq u leeyihiin inay ururo samaystaan ururadaas oo noqon kara urur shaqale ama ku darsami kara ama caawin kara urur shaqaale kale,si ay u doortaan xubno iyaga matala kuwaas oo siwada jir ah ugu dooda ulana gorgortama loo shaqeeyayaasha waxaa kale oo ururadaasi abaabuli karaan isu soo bax danta laga leeyahay ay tahay in lagu gorgortamo ama lagu helo waxyaalaha ay danta guud ee shaqaaluhu ay ku jirto sida difaacida xuquuqda shaqaalaha. Waxaa kale oo ay shaqaaluhu xaq u leeyihiin inayna ka qayb qaadan dhamaan wax yaalahan aan ka soo hadalay hadii ayna arintaasi jebinayn heshiis ay wada galeen qofka shaqaalaha ah iyo urur shaqaalaha taas oo dhib u keenaysa xubin ka sii noqoshada ururka iyo xaaladda shaqada ee qofka shaqaalaha ah, arimahaas oo ku cad sharciga lambarkiisu yahay 8(a)(3) [sharci lambar 158(a)(3) ee ciwaankan].

KU XAD GUDUBKA XUQUUQDA SHAQAALAHA

**Qaybta. 8. [§ 158.]** (a) [Ku xadgudubka xuquuqda shaqaalaha ee loo shaqeeyahu ku xadgudbayo ] Waa cadaalad daro lagula kacay shaqaalaha hadii loo shaqeeya yaashu isku dayaan

(1) Inay faragelin ku sameeyaan arimaha shaqaalaha iyagoo culays ku saaraya in shaqaalahu ka tanaasulaan xaqa uu siinayo sharciga lambarkiisu yahay 7 [Qaybta157aad ee ciwaankan];

(2) isla markaana isku deyaya inay iyagu maamulaan ama ay lug ku yeeshaan dhismaha iyo maamulka urur shaqaale kasta ama ugu deeqaya dhaqaale ama caawimaad nooc kale ah si ay lug ugu yeeshaan dhismaha ururka arimahaas oon dhamaantood la ogolayn gudiguna cadeeyay kuna cad sharciga lambakiisu yahay 6aad [qaybta 156aad ee ciwaankan],looma diidi karo sharci darana maaha in loo shaqeeyuhu uu abaaal marin siiyo qofka shaqaalaha saacadaha shaqada dhexdooda iyadoona shaqaaluhu luminayn wakhti iyo lacag toona

(3) in qofka shaqo loo diido ama dalacsiin loo diido iyadoo la takoorayo ama laga eexanayo ama arin kale oo ku saabsan xaaladaha shaqada lagu xumeeyo ama qofka lagu booriyo ama laga niyad jebiyo inuu xubin ka noqdo urur shaqaale dhamaan arimahaas oo dhami wax sal kule maaha sharciga, ka mana mid aha qodobkan [cutub hoosaad],ama sharci kasta oo dawladda maraykanka leedahay.waxaa kale oo sharcigu qabaa in aanu jirin wax loo shaqeeyaha u diidaya inuu heshiis la galo ururada shaqaalaha ( arintaas oo ah mid aan lagu aqoonsan,laguna dhisin laguna taageerin falkasta oo sharcigani(a) ee sharcigan [cutub hoosaad kan gudihiisa] sababtoo ah arintani maaha cadaalad daro lagula kacayo shaqaalaha) in shuruud lagaga dhigo shaqaalaynta qofka shaqaalaha ah iyaddoo shuruud looga dhigo inuu xubin ka noqdo urur shaqaale iyadoo arintaa shuruudaha laga saxiixayo shaqada inta uuna bilaabin ama markuu mudo go'an shaqeeyo,ama lagaadho wakhtigii lagu heshiiyay inay hirgasho marba kii dambeeya (i) Hadii urur shaqaalahaasi uu wakiil ka yahay shaqaalaha sida lagu sheegay sharciga lambarkiisu yahay.

9(a) [qaybta 159aad(a) ee ciwaankan] waxaa kale oo heshiiskan ka mid ah oo ku jirta qayb muhiim ah oo ku saabsan sida gorgortan wadajir ah loo sameeyo (ii) hadii aanan la raacayn doorasho loo qabtay sida uu sheegayo sharciga lambarkiisu yahaya 9(e) [qaybta 159aad(e) ee ciwaan kan ] Waxaa kale oo ladooanyn in hal sano ka hor inta uuna heshiiskani dhaqan gelin uu gudiga sare ansaxiyo ugu yaraan inta badan shaqaalaha xaqa u leh inay codeeyaan doorashada lagu badalayo maamulka urur shaqaalahaas,ayna doortaan maamul cusub oo saxiixa heshiiska: waxaa kale oo intaa dheer in aan la ogolayn in loo shaqeeye uu ku doodo inuu xaq u leeyahay inuu takooro ama ka eexdo qof shaqaale ah iyadoo sababtu tahay inaanu shaqaalahaasi ka tirsanayn urur shaqaale. (A) hadii ay jirto sababo macquul ah oo tusinaya inayna shaqaalahaas suurto gal u ahayn inuu xubin ka noqdo urur shaqaalahaas taas oo ka dhalan karta iyadoo shaqaalahaa lagu xidho shuruudo aan shaqaalaha kale lagu xidhin marka ay xubnaha noqonayaan,ama (B) ) hadii ay jirto sababo macquul ah oo tusinaya in shaqaalahaas loo diiday ama laga saaray urur shaqaale iyadoona sababtu ahayn inuu shaqaalahaasi bixin waayay lacagta uu qofkasta bixiyo marka uu xubinta noqanayo ama uu bixin waayay lacagta bil kasta la bixiyo si uu xubin u sii ahaado

(4) Waxaa kale oon iyadana la ogolayn in shaqaale shaqada laga eryo ama la takooro iyadoo sababtu tahay inuu shaqaalahani loo shaqeeyaha dacweeyay ama uu warbixin bixiyay isaga oo sharcigan cuskanaya [cutub hoosaad]

(5) Waxyaalaha ka dhalankara in loo shaqeeyuhu diido inuu la xaajoodo wakiilada matalaya shaqaalaha si ay ula gorgortamaan waxa ay ku cad yihiin sharciga lambarkiisu yahay 9 (a) [qaybta 159aad(a) ee ciwaankan].

**(b) [Ku xad gudubka Xuquuqda Shaqaalaha ee ururada shaqaalaha]** Waa sharci daro iyo xaqdaro lagula kacay shaqaalaha in ururada shaqaalaha iyo wakiiladiisa

(1) Inay u diidaan ama culays ku saaraan (A) inay shaqaaluhu adeeg sadaan ama isticmaalaan xuquuqda uu siinayo sharciga lambarkiisu yahay 7 [qaybta 157aad ee ciwaankan]: waxaa kale oo qaybtan lagu cadeeyay in aan sharcigan loo adeegsan karin in lagu wax yeeleeyo xuquuqda ay ururada shaqaaluhu u leeyihiin in sharciyadooda samaystaan iyagoo tixgelinaya dhowrayana xuquuqda xubnahooda,



Ama (B) in loo shaqeeyuhu uu doorto xubnaha uga qayb gelaya gorgortanka wadajirka ah ama lagu saxayo cabashooyinka.

(2) In la sababo ama laysku dayo in loo shaqeeye takooro qof shaqaale ah waxay xadgudub ku tahay qayb hoosaadkan (a)(3) [ee qayb hoosaadkan (a)(3) ee qaybtan ] ama in la takooro qof shaqaale ah sababtuna ay tahay in shaqaalahaa laga eryay ama loo diiday inuu xubin ka noqdo urur shaqaale iyadoon sababta looga eryay ama loogu diiday ayna ahayn inuu bixin waayay lacagta la bixiyo marka u horaysa ee xubinta la noqanayo ama lacagta bilkasta labixiyo si xubin loo sii ahaado.

(3) in la diido in si wada jir ah loola gorgortamo loo shaqeeye sida sharcigan ku cad sharcigani wuxuu qabanayaa wakiilada shaqaalihiisa xukun kiisu wuxuu ku cad yahay sharciga lambarkiisu yahay 9(a) [qaybta 159(a) ee ciwaankan];

(4)(i) waxaa iyaduna sharciga ka baxsan in laga qayb qaato, lagu dhaliyo ama lagu dhiiri geliyo qofkasta oo u shaqeeya qof leh ganacsi ama warshad inuu sameeyo shaqo joojin ama uu diido

inuu qabto shaqadii uu qaban jiray sida hadii uu ka shaqayn jiray wax soo saarka,gaadiidka, iyo warshadaynta ama hadii uu ka shaqayn jiray waxyaalo kale sida wax qorida,iyo badeecadaha kala duwan ama noockasta oo adeeg ah ama wax kale oo wax u dhimaya shaqa guud ahaan ama (ii) in loo hanjabo,ama culays lasaaro qofkasta oo ka shaqeeya ganacsi ama wax soo saar xidhiidh la leh ganacsi si uu u sameeyo wax dhib u keenaya meesha uu ka shaqaynayo arintan iyo mida ka horaysayba waa fal sharcidaro ah.

(A) Waxaa iyaduna sharciga ka baxsan in lagu khasbo ama shuruud looga dhigo loo shaqeeye ama qof iskii u shaqaysta inuu xubin ka noqdo urur shaqaale ama urur ay leeyihiin loo shaqeeyayaashu ama uu galo heshiis uu diidayo sharciga lambar kiisu yahay 8(e) [qayb hoosaad (e) katirsan qaybtan]

(B) Waxaa iyaduna sharciga ka baxsan in lagu khasbo ama shuruud looga dhigo qofkasta inuu joojiyo isticmaalidda,gadida ka shaqaynta ,qaadida ama la macaamilka wax soo saar ay shirkad leedahay ama warshadi leedahay ama meelaha wax lagu baakadeeyo ay leeyihiin ama in la joojiyo in ganacsi lala sameeyo qofkale ama in lagu khasbo ama shuruud looga dhigo in loo shaqeeye aqoonsado ama uu la gorgortamo urur shaqaale sheeganaya inuu wakiil ka yahay shaqaalaha loo shaqeeyaha hadii uuna urur shaqaalahaasi haysan sharci cadaynaya inuu wakiil ka yahay shaqaalahaas raacayana sida ku cad sharciga lambar kiisu yahay 9 qaybta 159aad ee ciwaankan]: Sida sharcigan ku cad majirto qayb sharcigan ka mid ah (B) oo ka dhigayso sharci daro waxaan awal hore sharci daro ahayn sida shaqo joojinta iyo banaan baxyada ay shaqaaluhu sameeyaan ama loo macnayn karo ama loo adeegsan karo si loo sameeyo wax sharciga ka baxsan

(C) Waxaa iyaduna sharciga ka baxsan in lagu khasbo ama shuruud looga dhigo in loo shaqeeye aqoonsado ama uu la gorgortamo urur shaqaale khaas ah.Hadii urur shaqaale kale loo sharciyeeyay inuu wakiil ka yahay shaqaalahaas isla markaana urur shaqaalahaasi buuxiyay shuruudaha uu dhigayo sharciga lamberkiisu yahay 9 ee sharciga shaqaalaha [qaybta 159aad ee ciwaankan]

(D) Waxaa iyaduna sharciga ka baxsan in lagu khasbo ama shuruud looga dhigo in loo shaqeeye shaqo gooni ah uu siiyo shaqaale ka tirsan urur shaqaale khaas ah ama ganacsi khaas ah,ama qayb shaqaalaha ka tirsan oo isku xirfad ah,ama qayb gaar ah oo isku darajo ah hadii uuna loo shaqeeyahaasi fulinayn amar ka soo baxay gudiga sare go’aan kaasna lagu qaatay gorgortan dhexmaray wakiilada shaqaalahaas iyo loo shaqeeyaha.

Sida sharcigan ku cad majiro wax ku jira qayb hoosaadka sharcigan (b) [qayb hoosaad kan] oo sharci daro ka dhigaya in loo shaqeeye diido in aan shaqaale kale soo gelin goobta shaqada iyo meelaha u xidhan loo shaqeeyahaas (marka laga reebo shaqaalahooda), hadii shaqaalaha loo shaqeeyahaas ay ka qayb qaataan shaqo joojin uu an sixiyay ama uu ogolaaday wakiilada shaqaalahaasi wakiiladaas oo ah kuwo uu loo shaqeeyuhu ku khasbanyahay inuu aqoonsado iyadoo la raacayo sharcigan[cutub hoosaad]: waxaa kale oo si dheeraad ah looga fahmayaa shacigan u jeedada qaybtan oo ah (4) Inayna jirin wax qaybtan ka mid ah oo loo macnayn karo ama adeegsan karo mamnuucida in wax la shaaciyo waxaan ka ahayn mudaharaad kaas oo ah mid lagu xidhayo iridda loo shaqeeyaha laakiin waa la samayn karaa dacaayad u jeedada laga leeyahay ay tahay in si run ah loogu wargeliyo dad waynaha oo ay ka mid yihiin macaamiisha iyo xubnaha ururada shaqaalaha iyadoo lagu war gelinayo inay badeecadaha qaarkood ay soo saaraan shirkado uu khilaaf wayni ka dhexeeyo ururada shaqaalaha isla markaana uu khilaaf ka dhexeeyo loo shaqeeye kale inta aanay shaacintani wax raad ah ku yeelanay qofkale oo u shaqeeya loo shaqeeye kale sababna ayna u noqonayn inuu diido shaqadii uu qaban jiray sida

hadii uu gaadiid wadi jiray uu diido inuu alaab ka qaado loo shaqeeyaha khilaafku ka taagan yahay ama noockasta oo shaqaha oo uu hada ka hor qaban jiray.
(5) waxaa kale oo iyaduna sharciga ka baxsan in qof shaqaale ah oo ku jira heshiiska uu sharciyaynayo qayb hoosaadka sharcigani (a)(3) [ee qaybtan] in la waydiisto ama shuruud looga dhigo si, uu xubin uga noqdo urur inuu bixiyo lacag badan iyadoo larabo in tusaale ahaan laga dhigo qiimahaas oo ah mid gudiga sare u arko xad dhaaf ama takoorid marka dhinac kasta laga eego .Marka uu gudiga sare arko falal kaas oo kale gudigu waa inuu sameeyaa baadhitaan lagu ogaanayo wax yaalaha kale kuwaas oo ah dabeecado iyo dhaqamo kale oo urur shaqaalayaashu ay macquul tahay inay sameeyaan iyagoo shirkaddaa si gooni ah u baadhaya waxaa kale oo la rabaa inay ogaadaan mushaharka lasiiyo shaqaalahaas ay arintu ku dhacday. (6) waxaa kale oo iyaduna sharciga ka baxsan in la isku dayo ama la sameeyo in loo shaqeeye bixiyo ama uu ogolaado inuu bixiyo ama uu sii hormariyo lacag ama wax yaalo kale oo qiimo leh iyadoo loo bixinayo sidii shaqo la qabtay ama la qaban doono oo kale iyadoon shaqadaa la qaban ama aan la qaban doonin (7) waxaa kale oo iyaduna sharciga ka baxsan in lasameeyo banaan bax lagu diidayo in qofna ka galo iridaha loo shaqeeyaha ama laysku dayo in la sameeyo banaanbax noocaas ah ,ama lagu hanjabo in banaan bax noocaas ah lasamaynayo iyadoo u jeedada laga leeyahay tahay in lagu khasbo ama shuruud looga dhigo in loo shaqeeye aqoonsado ama la gorgortamo urur shaqaale una aqoonsado in urur shaqaalahaasi wakiil yahay shaqaalaha loo shaqeeyahaas ama in lagu khasbo ama shuruud looga dhigo shaqaale u shaqeeya loo shaqeeye inuu aqbalo ama doorto in urur shaqaalahaasi wakiil ka yahay hadii uuna urur shaqaalahani u haysan sharci inuu wakiil ka noqdo shaqaalahan.
(A) Waxaa iyduna muhiim ah in meel kasta oo loo shaqeeyuhu aqoonsanyahay kuna dhaqmo sharcigan [cutub hoosaad] in aanay haboonayn in urur shaqaale kale uu waydiiyo ama su'aalo inuu wakiil ka noqdo shaqaalaha loo shaqeeyahan iyadoo la raacayo sharciga lambarkiisu yahay 9(c) ee sharcigan [qaybta 159(c) ee ciwaankan],
(B) Wuxuuna sharcigani ka shaqaynayaa meelkasta oo ay doorasho sharci ahi ka dhacday laba iyo tobankii bilood ee u dambeeyay guda hooda iyadoo la raacayo sharciga lambarkiisu 9(c) ee sharcigan [qaybtan 159(c) ee ciwaankan]
(C) Meel kasta oo laga sameeyay banaanbax iyadoon codsi loo qoran gudiga si loo helo ogolaansho waxaa kale oo loo baahanyahay in codsigan la gudbiyo sodon maalmood ka hor inta aan banaan baxa la samayn si wakhti ku filan ay u helaan gudiga codsiga ka soo ka jawaabayaa iyadoo laraacayo sharciga lambarkiisu yahay9(c) [qaybta 159(c) ee ciwaankan]

## SHARCIGA HEER QARAN EE XIRIIRKA GUUD EE SHAQAALAHA

waxaa kale oo sharcigan sheegayaa,marka gudiga sare codsiga loo geeyo inuu gudigu codsiga si degdeg ah u fiiriyo isagoon tix gelinayn waxa uu sheegayo qodobka 9aad ee sharcigan 9(c)(1) [qaybta 159(c)(1) ee ciwaankan]waxaa kale oo larabaa in gudiga sare uuna tixgelinin hadii urur shaqaale muujinin inuu danaynayo codsigan iyo in doorasho la qabto markaa waxaa la rabaa inuu gudigu amro doorasho marka la helo wakhti ku haboon qabashada doorashada ka dibna waxaa la rabaa inuu gudigu ogolaado natiijada doorashada. Waxaa si dheeraad ah loogu cadeeyay, in aanu jirin wax qaybtan ka mid ah (C) oo loo fasiran karo in ay diidayso banaan baxyo iyo dacaaya ujeedada laga leeyahay ay tahay in si run ah loogu wargeliyo ama talo loogu siiyo dad waynaha(dad waynahaas oo ay ka mid yihiin macaamiishu loo shaqeeyaha khilaafku ka taagan yahay) iyadoo loo sheegayo in loo shaqeeyahani uuna shaqaalaynin dadka qaarkood ama uu qandaraas kula jiro urur shaqaale dadkiisana keliyana shaqaaleeyo.Waxaa keliya oon banaan baxan la ogolayn hadii ay qofkale oo u shaqeeya loo shaqeeye kale ay ku dhalinayso inuu

joojiyo shaqadii uu u qaban jiray loo shaqeeyahiisa sida hadii uu darawal ahaa uu diido inuu alaab qaado, ama shaqo kale oo uu qaban jiray.
Majiro wax fakhradan ka mid ah (7) oo loo fasiran karo in qoraalkani ogolaanayo fal ah xadgudub lagu xadgudbayo xuquuqda shaqaalaha taas oo ah arin sharcigani aanu ogolayn 8(b) [ee qayb hoosaadkan].

**(c) [rayi cabirid iyadoon qofka loogu hanjabin in laga aargoosan doono ama aan la khasbin ama aan loo balan qaadin in wax la siin doono]** Inuu qofku fikradiisa sheego, ama waxka doodo,ama uu talo bixiyo qof walbana ogaysiiyo,hadii ay qoraal tahay,ama sawir ,ama wax muuqda mana aaha wax sharcigan ka mid ah oo ka dhigaya ama cadaynaya inay tahay xad gudub la gula kacay xuquuqda shaqaalaha [cutub hoosaad], hadii uuna rayi cabirkan ayna ku jirin wax hanjabaad xanbaarsan aargoosi ama khasbid ah,ama balan qaad ah in qof wax la siinayo.**(d) [Sida ay Waajib u tahay in si wada jir ah loo gorgortamo]** Ujeedada qaybtani waxay tahay,in si wada jir ah ay u gorgortamaan wakiilada matalaya shaqaalaha iyo loo shaqeeyuhu.Waa arin waajib labada dhinacba saaran ahna inay dhawraan si wakhti macquul ah arimaha ugu xaliyaan, waxa kale oo larabaa inay si daacad nimo iyo tanaasul ku jiro uga wada hadlaan arimaha la xidhiidha musharka iyo saacadaha shaqadaba iyo wax yaalaha kale ee la xidhiidha arimaha shaqada iyo shaqaalaha,ama wada xaajood ku saabsan heshiis ama su’aal ka dhalata arimaha laga wada hadlayay,iyo qoritaanka iyo meel marinta qandaraaska iyo heshiiska laysku afgartay, iyadoo lagu qorayo wax kasta oo lagu heshiiyay hadii uu codsado dhinac ka mid ah labada dhinac.Laakiin waxaa iyaduna meesha ku jirta in waajib nimada ay tahay inay labada dhinac gorgortamaan ayna ku khasbayn labada dhinac mid ka mid ahi inuu aqbalo fikradaha dhinaca kale ama inuu tanaasul u sameeyo dhinaca kale.Waxaa kale oo sharcigani cadaynayaa in meelkasta oo ay ka jirto qandaraas la kala saxiixday oo ay kala saxiixdeen shaqaale iyo warshad ama shaqaale iyo ganacsi qandaraas kaana lagu gaadhay gorgortan si wada jir ah loo gorgortamay, waa inuu jiro waajib kale oo ka dhalanaya oo ah inuuna labada dhinac midkood uuna heshiiska ka bixin ama uuna heshiiska wax ka badalin,hadii aan dhinaca arintaa ka baxayaa (1) uuna u dirin qoraal ogaysiin ah dhinaca kale ee heshiiska ama qandaraaska kula jiray lixdan maalmood ka hor taariikhda heshiisku ku egyahay hadii heshiiska ama qandaraasku ayna lahayn taariikh uu dhamaanayo waa in dhinaca heshiiska ka baxaya ama wax ka badalaya la siiyo dhinaca kale lixdan maalmood oo ogaysiis ah (2) Waxaa kale oo haboon in wax loo balanqaado dhinaca heshiiska ama qandaraaska lagaga baxayo,isla markaana waa in balan qaadyadu ay noqdaan kuwo soo jiidanaya dhinaca kale iyadoo u jeedada laga leeyahay ay tahay inay ogolaadaan inay wada xaajood ka galaan wixii hore loogu wada heshiiyay si wax looga badalo ama dhinaca kale uga baxo (3) waxaa kale oo larabaa in la ogaysiiyo arintan hay’ada u qaabilsan dawlada dhexe ee maraykanka dhexdhexaadinta iyo heshiisiinta mudo sodon maalmood guda hood ah marka lagu dhawaaqo ogaysiiska is afgaran waaga isla markaana waxaa larabaa in la ogaysiiyo hay’adaha u dhisan dhexdhexaadinta iyo heshiisiinta ee gobolada maraykanka ama maamulada madaxa banaan ee hoos yimaado dawladda maraykanka si ay u dhex dhexaadiyaan ama u heshiisiiyaan khilaafaadka u dhexeeya dhinacyada is haya ee goboladooda ama maamuladooda ka jira.Waxaa kale oo sharcigani qabaa inta aan weli heshiis laga gaadhin ee wada hadaladu socdaan
(4) Inay shaqadu si buuxda u socoto iyadoon la samayn wax shaqo joojin ah ama albaabo xidhid ah iyadoo la qadarinayo dhamaan qodobadii iyo waxyaalihii kale heshiiska ama qandaraaska lagu wada jiray uu qorayay waxaana arinta sidaa lagu wadayaa mudo lixdan maalmood ah ama inta qandaraaska wakhtigiisu ka dhamaanayo kolba kii dambeeya.

Waajibaadka uu fakhrooyinkan lambaradoodu kala yihiin (2), (3), and (4) ee qayb hoosaad kani] dusha ka saarayaan, loo shaqeeyaha ,shaqaalaha iyo ururada shaqaalaha waa inayna noqon kuwo loo adeegsan karo marka gudiga sare waraysiga shaqaalaynta la yeelanayo ama marka uu sharciyaynayo shaqaalaha cusub taas oo dhacda marka urur shaqaale ama qof shakhsi ah oo qandaraas ku jiray wakiiladooda matali jiray uu wakhtigu ka dhamaado kuwaas oo hoos iman jiray sharciga lambarkiisu yahay 9(a) [qaybta 159(a) ee ciwaankan], isla markaana loo baahanyahay in wakiilo cusub la doorto kuwaas oo badali doona kuwii hore . Waxaa kale oo iyadana larabaa in waajibaad kaas aan kor ku soo sheegnay aan loo fahmin ama aan loo macnayn in uu ku khasbayo labada dhinac, mid ka mid ahi inuu aqbalo ama uu kala xaajoodo in wax laga badalo heshiis yadii iyo qandaraasyadii hore loo wada gaadhay kuwaas oo lahaa wakhti go’ an oo ay ku dhamaadaan. Hadii is badaladu hirgalaan inta aan dib loo furin waxyaalihii hore loogu heshiiyay iyadoo laraacayo sharciyada qandaraaska,shaqaale kasta oo sameeya shaqo joojin inta lagu jiro mudada ogaysiiska ee lagu cadeeyay sharciga lambar kiisu yahay(g) ee qayb hoosaad kan ama sameeya shaqo joojin dhamaan wakhtiyada sharcigani sheegayo inaan shaqo joojin la samayn karin, waa inuu lumiyo shaqadiisa uu u shaqayn jiray loo shaqeeyaha ay shaqaalaha khilaafku ka dhexeeyo iyadoo laraacayo sharciyada lambaradoodu yihiin 8, 9, iyo 10 ee sharcigan [qaybta 158, 159, iyo 160 ee ciwaankan], laakiin shaqo luminta uu shaqaalahani shaqadiisa lumiyey waa inay istaagto oo aan la tixgelin hadii loo shaqeeyahani uu markale dib u shaqaaleeyo shaqaalahan. Waxaa kale oo larabaa in markasta oo gorgortan wadajir ah ay samaynayaan shaqaale u shaqeeya hay’ad caafimaad iyo loo shaqeeyahoodu waa in sharciga ku qoran qaybta 8(d) [ee qayb hoosaadkan] waa in wax looga badalo sidan soo socota:
(A) Wakhtiga ogaysiiska ee qaybta 8(d)(1) [qoraalka lambarkiisu yahay (1) ee qaybtan ] waa inuu noqdo sagaashan maalmood; ogaysiiska ku cad qaybtan 8(d)(3) [fakhrada (3) ee qayb hoosaad kan ] waa inuu noqdo lixdan maalmood; isla markaana wakhtiga qandaraaska ee qaybtan 8(d)(4) [qoraalka (4) ee qayb hoosaad kan ] waa inuu noqdo sagaashan maalmood (B) iyadoo gorgortanku yahay heshiiska u horeeya ee lawada gaadhayo ka dibna uu raacayo sharciyaynta ama aqoonsigu. ururada shaqaaluhu waa inay siiyaan ugu yaraan sodon maalmood oo ogaysiis ah hay’adaha uu codasanayo inla ogaysiiyo khilaafka qaybta 8(d)(3) [ee fakhradan qayb hoosaad kan (3) ee qayb hoosaad kan]
(C) kadib marka la ogaysiiyo ha’adaha dawlada dhexe ee u xilsaaran dhexdhexaadinta iyo heshiisiinta iyadoo la raacayo midkii ladoonayo ee labadan qodob ah (A) ama (B) ee jumladan , isla markaana hay’adahani waa inay sidegdeg ah ula xidhiidhaan labada dhinac ee is haya iyagoo isku deyaya inay intii awoodooda ah dhex dhexaadiyaan iskuna dayaan inay is afgarad iyo heshiis dhex dhigaan labada dhinac . Waxaa kale oo larabaa inay labada dhinac si buuxda oo degdeg ah uga qayb qaataan wada hadalkan iyadoo hay’adahu qabanayaan shirar badan oo noocan ah iyadoo u jeedadu tahay inay dhaliyaan heshiis degdeg ah oo lagu xalinayo khilaafka labada dhinac.

**SHARCIGA HEER QARAN EE XIRIIRKA GUUD EE SHAQAALAHA**

Waxaa ladaabacay. L. 93–360, Lulyo 26, 1974, 88 Stat. 395, waxaana wax laga badalay jumlada u dambaysa ee fakhrada qaybta8 (d) iyadoo laga saarayo odhaahaha oranaya “lixdan maalmood” lana gelinayo odhaahaha odhanaya “ogaysiis kasta” iyadoo la gelinayo meesha ka horaysa odhaahaha odhanaya “waa inuu lumiyo” odhaahda “, ama kuwa odhanaya kaasoo sameeyay shaqo joojin kasta oo dhacda wakhtiyada sida gaar ah loogu mamnuucay qayb hoosaad kan (g) ee qaybtan.” Waxaa kale oo iyadana wax laga badalay dhamaadka fakhrada qaybta.8 (d) iyadoo

lagu daray jumlad cusub taasoo odhanaysa “goor kasta oo gorgortanka si wada jirka ahi loo gorgortamo uu caawiyo in heshiis laga gaadho khilaaf laba dhinac dhexyaala.”]

**(e) [ Fulinta qandaraas ama heshiis lagu cunaqabataynayo loo shaqeeye kale ,iyo waxyaalaha ka reeban een la ogolayn]** waa in la ogaado inay tahay xadgudub lagu sameeyay xuquuqda shaqaalaha in urur shaqaale ama loo shaqeeye inuu saxiixo qandaraas ama heshiis kaa soo sicad ama si dadban u sheegaya in loo shaqeeyahaasi joojinayo ama dib uga hakanayo ama ogolaanayo inuu joojiyo ama hakiyo la macaamilka,gadida,qaadida,iyo isticmaalida wax soo saarka loo shaqeeye kale ama joojinta la macaamilka iyo ganacsi la samaynta qofkale,waana in qandaraas kasta ama heshiis kasta oo ay ku jiraan wax yaalahaa aan kor kaga soo hadalay oo kale aanay dhaqan gelin oo la joojiyo: Waxaa kale oo halkan lagu cadeeyay inaanu jirin wax qayb hoosaad kan ka mid ah,(e) [ee qayb hoosaadkan] oo lagu dabaqi karo heshiis dhexmaray urur shaqaale iyo loo shaqeeye heshiis kaas oo ku saabsan shirkadaha dhismaha lana xidhiidha qandaraas iyo qandaraas hoosaad la kala qaadanayo si loo dhiso goob dhismo u baahan dhismahaas oo ay ka mid yihiin badalid lagu sameeyo muuqaalka dhismaha ,rinjiyayn,dayactir ama dib u habayn ama shaqooyin kale oo la xidhiidha dhismaha : Waxaa kale oo si dheeraad ah loogu faahfaahiyey, Ujeedada qayb hoosaad kan (e) iyo qaybtan8(b)(4)(B) [qayb hoosaad kan iyo qayb hoosaad kan (b)(4)(B) ee qaybtan] marka la adeegsanayo ereyada “ loo shaqeeye kasta,”waxaa laga hadlayaa “ qofkasta oo ku jira ganacsi ama wax yaalo kale oo lug ku yeelan kara ganacsi,” sidoo kale erayga “qofkasta oo kale ” marka la adeegsado iyadoo lala xidhiidhinayo erayo kale sida“wax soosaare kasta oo kale ama warshad wax samaysa ,” “loo shaqeeye kale oo kasta ” ama “qof kale oo kasta” maaha in lagu daro dadka ka shaqeeya meelaha kale sida kuwo wax iibiya kuwa ka shaqeeya warshada wax farsameeya ,kuwa qandaraaska qaata ama kuwa qandaraas hoosaadka qaata ama qof ka shaqaynaya badeecadaha, ama gudaha goobta wax lagu gado ama warshadda ama ka shaqaynaya walxo laysku xidhxidhayo oo saf wax soosaar ah sida samaynta dharka oo kale : waxaa kale oo sharcigan lagu cadeeyay inayna jirin qayb sharcigan ka mid ah [cutub hoosaadkan] oo mamnuucaysa hirgelinta heshiis la gaadhay intii uuna soo bixin sharcigan wax yaalaha qaarkood diidayaa.

**(f) [Heshiisyada ay hoos imanayaan shaqaalaha ka shaqeeya dhismayaasha guda hooda iyo shirkadaha dhismaha]**maaha xadgudub xuquuq shaqaale sida uu dhigayo sharciga qayb hoosaad yadani (a) iyo (b) ee qaybtan hadii loo shaqeeye shaqadiisu inta badan tahay dhismo iyo shirkad dhismeed uu lagalo heshiis ay ku jiraan shaqaalaha ka shaqeeya ( ama ay shaqadoodu ku lug leedahay) dhismaha iyo shirkadaha dhismaha iyadoo meeshaas uu ka jiro urur shaqaale ay shaqaalaha dhismuhu xubno ka yihiin ( majiro wax arintan ku saabsan oo uu aqoonsanyahay ,ama uu hore u ogolaaday ama taageeray ama lagu cadeeyay sharcigan qaybtiisa 8(a) ee sharcigan [qayb hoosaadkan (a) ee qaybtan] kaasoo arintan ku tilmaamaya inay tahay xad gudub lagu sameeyay xuquuqda shaqaalaha) sababta oo ah (1) inta badan xaaladda ururada shaqaalaha laguma dhisin adeegsiga sharciga qaybta 9aad ee sharcigan [qaybta 159 ee sharcigan] ka hor inta aan la samaynin heshiiska , ama (2) heshiiskan oo kale waxaa shuruuda lagu galaa tahay in qofku shaqaale yahay inta uuna heshiiska gelin isla markaana uu xubin ka noqdo urur shaqaale marka ay todoba maalmood ka soo wareegto maalintii la shaqaaleeyay ama waa inuu todoba maalmood uu shaqaale ahaa maalinta heshiisku hirgelayo hadba kii dambeeya, ama (3) heshiiskan oo kale waxaa shuruud u ah in loo shaqeeyuhu ogaysiiyo ururada shaqaalaha inay fursad shaqo ka banaan tahay loo shaqeeyahaas ama uu loo shaqeeyuhu siiyo fursad ay ururada shaqaaluhu ugu sheegaan dadka shaqadaas u qalma una baahan

ama (4) waa in heshiiskani si khaas ah u cadaynayo tababar ama khibrad aan badnayn oo looga baahanyahay qofka shaqada la siinayo ama waa in muhiimada koowaad ay leeyihiin dadka mudada dheer u shaqaynayey loo shaqeeyahaas ama deegaan khaas ah oo loo shaqeeyahaasi ka hawl galo waxaa kale oo halkan lagu cadeeyey, In ayna jirin wax qayb hoosaad kan ka mid ah oo siinaysa ama sheegaysa in go'aan ka u dambeeya ee la raacayaa uu ka imanayo sharciga qaybta 8(a)(3)ee sharcigan[qayb hoosaad kan (a)(3) ee sharcigan]: Waxaa kale oo halkan si dheeraad ah loogu sharaxay , Heshiis kasta oo sharcigu ogolayn ,Marka laga reebo qaybta (1) ee qayb hoosaad kan , waa inayna noqon mid hor istaagta codsiga ay qoranayaan dadka raba inay raacaan sharciga qabtiisa 9(c) ama 9(e) [qaybta 159(c) ama 159(e) ee ciwaankan].

**(g) [ogaysiinta la ogaysiinayo in ladoonay in la sameeyo shaqo joojin ama banaabax lagu samaynayo goob caafimaad ]** Ka hor inta uuna urur shaqaale samayn shaqo joojin ama banaan bax ama uuna la imanin wax yaale kale oo shaqo diidid ah oo uu ku diidayo inuu ka shaqeeyo goob caafimaad waa inuu ogaysiis qoraal ah u gudbiyo ugu yaraan toban maalmood ka hor inta uuna talaabo qaadin, dhamaan dhinacyada ay arintu khusayso sida goobta shaqada,iyo hay'addaha dawlada dhexe ee dhex dhexaadinta iyo heshiisiinta u xilsaaran isaga oo ku sheegaya qoraalka waxa ay damacsanyihiin, laakiin uma baahna inay ogaysiis bixiyaan hadii ay rabaan inay ka gorgortamaan heshiis hore loo gaadhay oo la sharciyeeyay waxaa kale oo sharcigu dhigayaa in aan la bixin Karin ogaysiiska uu qayb hoosaad kani amrayo ilaa uu dhamaado wakhtiga heshiiskii hore ee lawada gaadhay arintaas oo ah mid si gooni loogu cadeeyay qaybtan (B) ee jumladda u dambaysa ee qaybta 8(d) ee sharcigan [qayb hoosaadka (d) qayb hoosaadkan]. Waxaa kale oo larabaa inuu ogaysiisku sheegayo taariikhda iyo saacada ay shaqo joojintani bilaabmayso.Waxaa kale oo iyaduna suurto gal ah in marka ogaysiiska la bixiyo kadib wakhtiga la dheerayn karo iyadoo arintaa ay labada dhinacba qoraal ku cadaynayaan.
[waxaa la daabacay. L. 93–360, luulyo 26, 1974, 88 Stat. 396, laguna daray qayb hoosaad kan . (g).]

## WAKIILADA IYO DOORASHOOYINKA

**QAYBTA. 9 [§ 159.] (a) [Wakiilada khaaska ah; Shaqaalaha xalinta cabashooyinka shaqaaalaha iyadoo sitoos loo la shaqaynayo loo shaqeeyaha ]**Wakiilada ay shaqaalaha badan koodu u xilsaareen ama u doorteen inay si wada jir ah ula gorgortamaan loo shaqeeyuhu waa inay noqdaan kuwo si khaas ah wakiil uga ah dhamaan shaqaalaha waxaana kooxdan wakiilada laga rabaa inay ula gorgortamaan loo shaqeeyaha si wada jir ah iyagoo kala gorgortamaya arimaha ay ka midka yihiin kordhinta mushaharka. saacadaha shaqada ,ama arimaha kale ee la xidhiidha shaqada iyo shaqaalaha: waxaa kale oo halkan lagu cadeeyay in koox kasta oo shaqaale ah ama qof kasta oo shaqaale ahi ay wakhti kasta xaq u leeyihiin inay cabashadooda u gudbiyaan loo shaqeeeyaha ay u shaqeeyaan isla markaana xal la gaadhi karaan loo shaqeeyaha iyada uuna gudiga wakiilada ee shaqaaluhu u doortay gorgortanku uuna soo faragelinin taasina waxay dhacaysaa hadii heshiiska cusub uu yahay mid ka duwan heshiiskii ay wakiilada gorgortanka ee shaqaaluhu la gaadheen loo shaqeeyahaas ama uu yahay mid ka duwan qandaraas yadii ama heshiisyadii hore loo kala saxiixday ee weli shaqaynaya. Waxaa kale oo halkan si dheeraad ah loogu cadeeyay, in lasiiyay ooy xaq u leeyihiin wakiilada gorgortanka fursad ay goob joog kaga noqdaan marka arintan la xalinayo.**(b) [go'aan ka gaadhida uu gudiga sare go'aan ka gaadhayo wakiilada loo xulo gorgortanka]** gudiga sare waa inuu go'aan ka gaadho arimaha isagoo u qiimaynaya mid mid ,fiirinayana in arintaasi keenayso in si xornimo buuxda ah ay shaqaaluhu u adeegsan karaan ama u isticmaali karaan xuquuqda uu sharcigani siinayo [cutub

hoosaad], waxaa kale oo la rabaa in kooxda loo xulayo inay noqoto wakiilada gorgortanku ay tahay mid laga dhexdoortay shaqaalaha ahna kuwa xirfad layaasha ah ama kuwa aqoonta leh ama kuwa ku soo xiga .: waxaa kale oo halkan lagu cadeeyay , in aan la ogolayn in gudiga sare (1) iska go'aamiyo in koox kastaa ay ku haboon tahay arinta gorgortanka.

**SHARCIGA HEER QARAN EE XIRIIRKA GUUD EE SHAQAALAHA**

Hadii kooxdaas ay ku jiraan shaqaale xirfadlayaal ah iyo kuwo aan xirfad lahayn labaduba ,hadii ayna shaqaalaha xirfadlayaasha ah badan koodu u codayn in lagu daro wakiilada koox noocan oo kale ah ama (2) aanay go'aamin in kooxdan xirfada hoose lihi aanay ku haboonayn in hawshan loo magacaabo iyadoo wakhti hore gudiga sare u xulay koox kale,hadii ayna inta badan shaqaalaha la magacaabay ee xirfada hoose lahi aanay ka codayn in loo sameeyo wakiilo gooni ah ama (3) aanay go'aamin in koox kasta oo la xulo ay ku haboon tahay shaqadan hadii lagu daro shaqaale kale. Qofkasta oo loo shaqaaleeyay waardiye ahaan isagoo ka soo hor jeeda shaqaalaha iyo sharciyada dadka kale si uu u ilaaliyo hantida loo shaqeeyaha ama ilaaliyo nabad gelyada dadka ku sugan ama ku jira xayn daabka loo shaqeeyaha, lama ogola sharcina maaha in uu urur shaqaale u noqdo wakiil uga qayb qaata gorgortanka, hadii urur shaqaalahaasi uu wakiil kayahay shaqaale aan ahayn wardiyayaasha. Waxaa kale oo aan la ogolayn inay waardiya yaashu xubin ka noqdaan ama ay la yeeshaan xidhiidh toos ah ama mid aan toos ahayn iyada oo urur shaqaalahaasi wakiil ka yahay shaqaale kale. Keliya waxaa wakiil ka noqon Kara waardiya yaasha urur shaqaale ay waardiya yaal keliya ahi xubno ka yihiin.

(c) **[Dhegaysiga su'aalaha khuseeya ganacsiga ; sharciga iyo sharciyaynta ]** (1) wakhti kasta oo ay codsi gudbiyaan iyagoo raacaya sharciga ay dejiyeen gudiga sare
(A) shaqaale ama koox shaqaale ka tirsani ama qofkasta oo shaqaalaa ama urur shaqaale matalaya tiro badan oo shaqaala ah(i) kuwaas oo raba inay wakiilo gorgortanka uga qayb gala samaystaan kadibna loo shaqeeyuhu diido inuu u aqoon sado wakiiladooda sida kuwa lagu sheegay sharciga lambarkiisu yahay 9(a) [qayb hoosaadka (a) qayb hoosaadkan], ama (ii) ku dhawaaqa qof ama urur shaqaale ,kaasoo hore loo sharciyeeyay ama hada loo shaqeeyahoodu u aqoonsan yahay inuu wakiil gorgortan yahay inuuna hada kadib yahay wakiil aan sharci ahayn sida wakiilka uu sheegayo sharciga qaybta 9(a) [qayb hoosaad (a) qaybtan gudaheeda]; ama (B)loo shaqeeye sheeganaya in hal qof ama dhowr qof ama urur shaqaale inay ula yimaaden kana codsadeen inuu u aqoon sado wakiilo gorgortan oo ah kuwa lagu sheegay sharciga qaybta 9(a) [qayb hoosaad (a) qayb hoosaadka];markaa gudiga sare waxaa laga doonayaa inuu baadhitaan ku sameeyo xaalada codsiga noocan ah kadibna hadii uu helo wax sabab ah oo uu ku rumaysan karo inay jirto su'aal ku saabsan cida wakiil noqonaysa taas oo saamayn ku yeelanaysa ganacsiga inuu soo oogo dacwad ku haboon arintan iyadoo la ogaysiinayo dadka ay khusayso. Dacwadan oo kale waxaa qaadi Kara sarkaal ama shaqaale ka tirsan xafiiska gabolka kaas oo larabo inuuna samaynin wax talo bixin ah oo ku saabsan kiiska kadib markuu dacwada dhegaysto. Isla markaa hadii gudiga sare ka dhex hello dacwada la qaaday wax cadaynaya inay su'aal ka taagan tahay arinta la xidhiidha wakiil nimada ,waa inay doorasho ku dhawaaqaan kadibna cod qarsoodi ah laqaado natiijadana la ansixiyo lana sharciyeeyo.
(2) Si loo ogaado in su'aasha ku saabsan wakiil nimadu ay taabanayso ganacsiga iyo inkale. Sharcigan oo kale waa in lagu fuliyo iyadoon la eegayn lana tix gelinayn qofka uu yahay ruuxa codsiga soo qoray ama waxa uu rabo iyo danta laga leeyahay codsiga .Waxaa kale oo sharcigu qabaa in hadii gudiga sare diido kiis in uu kiiskaasi halkaa ku xidhmayo ,ama hadii uu urur shaqaale u diido inuu doorashada ka qayb galo iyadoo sababtu tahay in urur shaqalahaasi ama

wakiiladii hore ee urur shaqaalahaasi aanay waafaq sanayn ama jebiyeen sharciga qaybta 10(c) [qaybta 160(c) ee ciwaankan].
(3) Majirto doorasho loo qaban karo koox loo xulay ka qayb galka gorgortanada ama koox iyaga ka hoos shaqaysa taas oo laba iyo tobankii bilood ee u dambeeyay guda hooda lagu doortay doorasho sharci ah. Shaqaalaha ka qayb qaata cuna qabatayn dhaqaale, kuwaas oon xaq u lahayn in dib meelahoodii loogu celiyo waxay xaq u leeyihiin inay codeeyaan iyadoo sharcigan la raacayo marka uu gudiga sare u arko arintani inay waafaqsan tahay u jeedada iyo wax yaalaha kale ee sharcigani u taagan yahay [cutub hoosaad] doorasho kasta oo la qabto laba iyo toban bilood gudahood kadib marka shaqo joojin la sameeyo. Doorasho kasta oo dadka la kala dooranayo midkoodna uuna helin cod ku filan, waa in doorasho lagu kala reebayo la qabto iyadoo la tartan siinayo labadii qof ee ugu codka badnaa.
(4) Majiro wax qaybtan ka mid ah oo loo turjumi karo inay qaybta sharcigani mamnuucayso in layska dayn karo in la dhegaysto dacwad iyadoo sababta laysaga daynayaa ay tahay in doorasho la qabto iyadoon dacwad la dhegaysan iyadoo isla markaana la raacayo sharciga iyo shuruucda iyo go'aanka gudiga sare. (5) Si loo ogaado inay kooxi ku haboon tahay u jeedada lagu tilmaamay qayb hoosaadka (b) [qaybtan gudaheeda] waa inayna lug ku yeelan sida ay shaqaaluhu isu abaabulaan arintan la go'aan ka gaadhideeda.
**(d) [Codsi ah fulinta ama dib u fiirinta ; qoraalada]** Wakhti kasta oo amar uu gudiga sare bixiyo isagoo raacaya sharciga qaybta 10(c) [qaybta 160(c) ee ciwaanka] wuxuu ku salaysan yahay dhamaan ama qayb ka mid ah sharcigan oo si gooni ah loogu sharciyeeyay baadhitaano la sameeyay iyadoo la raacayo qayb hoosaad kan (c) qaybta sharcigan ,waxaa kale oo jirta codsi lagu codsanayo fulinta ama dib u fiirinta amarada noocan ah ,sharciyaynta noocan ah iyo cadaynta iyo qoraalada baadhitaanada noocan ah waa in lagu daro qoraalka diiwaanka guud sida uu qabo sharciga qaybta10(e) ama 10(f) [qayb hoosaad kan (e) ama (f) ee qaybtan sharcigan 160 ee ciwaan kan], iyo iyadoo si dedeg ah loo raacayo amarka maxkamada ee hirgelinaya,wax ka badalida ama dhinac iska dhigida dhamaan ama qayb kamid ah amarada gudiga sare waa in la sameeyo lana guda galo qirashooyinka , cadaymaha iyo nidaam yada kale ee lagu tala galay qoraalada **(e) [Xadka doorashooyinka lagu sameeyo codbixinta qarsoodiga ah]** (1) marka ugu horaysa ee shaqaale boqol kiiba sodon ama ka badan ay iska diiwaan geliyaan xafiiska gudiga sare si ay u doortaan koox shaqaalaha uga qaybgasha gorgortan ku waas oo ku hoos jira heshiis ay wada galeen loo shaqeeyaha ay u shaqeeyaha iyo urur shaqaale raacaya sharciga qaybta 8(a)(3) [qaybta 158(a)(3) ee ciwaan kan], isla markaana iyagoo gudbinaya codsi ay ku doonayaan in laga baxo heshiiskii hore ,gudiga sare waa inuu qaado codbixin qarsoodi ah oo ay shaqaaluhu codkooda ku dhiibanayaan ka dibna gudiga sare waa inuu sharciyeeyo natiijada iyo heshiiskii dhexmaray loo shaqeeyaha iyo urur shaqaalaha.
(2) Sharci hoosaadkani ma ogola in doorasho cusub loo qabto koox gorgortan loo doortay ama caawiye yaashooda hadii la doortay laba iyo tobankii bilood ee ugu dambeeyay iyadoo doorashadaasi ahayd mid si sharci ah u dhacday.

KA HORTEGIDA IN LAGU XADGUDBO XUQUUUQDA SHAQAALAHA

**QAYBTA. 10. [§ 160.] (a) [Guud ahaan awooda gudiga sare]** Gudiga sare waxaa awood loo siiyay oo sharcigan lagu cadeeyay inuu ka hortago joojiyana qofkasta oo uu isku daya inuu ku xadgudbo xuquuqda shaqaalaha (kaas oo lagu gudaha qaybta 8 [qaybta 158 ee ciwaan kan]) ku xadgudub kaas oo isla markaana saamayn ku yeelanaya ganacsiga. Awood siin tani waa inayna habayaraatee wax raad ah ku yeelan wax yaalaha kale sida heshiis yada ama arimaha kale ee loo

sameeyay ama loo samaynayo in lagu ilaaliyo heshiisyada ay goboladu ay ku gaadheen baadhitaano ay sameeyeen

**SHARCIGA HEER QARAN EE XIRIIRKA GUUD EE SHAQAALAHA:**

waxaa kale oo sharcigan ku cad, in gudiga sare uu heshiis la geli karo hay’ad kasta oo ka jirta gobolkasta oo maraykan ah ama maamul kasta oo madax banaan oo hoos yimaada dawlada maraykanka isagoo heshiis kula gelaya in hay’adaasi ay awood u leedahay inay xaliso kiisaska ka dhaca , shirkadaha iyo ganacsiyada kale ee ku yaala meesha ay hay’adaasi kajirto (marka laga reebo shirkadaha macdanta qoda,warshadaha ,isgaadhsiinta,iyo gaadiidka waxaan ka ahayn meelaha dadka ka shaqaynayaa ay u badan yihiin kuwa deegaanka ka yimad) in kastoo laga yaabo inay kiisaska noocan ahi ay yihiin kuwo lug ku leh hawla ku saabsan is afgaranwaa u dhexeeya shaqaale,iyo loo shaqeeye kuwaas oo saamayn ku yeelan kara ganacsiga ,hadii aanu sharciga u yaala gobolka ama maamulka madaxa banaan ee loogu talagalay kiiskan oo kale aanu ahayn mid khilaafsan sharciga gudiga sare ee shaqaaluhu ugu tala galeen kiiskan oo kale [cutub hoosaad] ama aan sharcigan wax laga badalin taas oo ka dhigaysa mid khilaafsan sharcigan.

**(b) [Ogaysiinta,dhegaysiga dacwadaha maxkamaduhu,waa inuu dhacaa mudo lix bilood ah; jawaabtana waa in la bixiyo lix bilood gudahood ;laakiin sharchigani makhuseeyo sharciga maxkamadaha ee cadaymaha].** Wakhti kasta oo qof lagu soo eedeeyo in uu qofkaasi sameeyay ama hadda samaynayo arin ku xad gudub xuquuq shaqaale,gudiga sare ama hay’ad kasta oo gudiga sare uu magacaabay taas oo u eedada loo magacaabay ay tahay inay arimahan oo kale ay wax ka qabato waa inay leeyihiin awood ay su’aal ku waydiin karaan qofka xadgudubka samaynaya iyagoo isla markaana ka shaqaynaya sidii ay xuquuqda qofka soo dacwooday u difaaci lahaayeen iyagoo isla markaana ogaysiinaya qofka laga soo dacwooday inuu hor yimaado maxkamad ay qaadayaan gudiga sare , xubno gudiga sare ka mid ah ama hay’ad arintan loo xilsaaray oo ka irta meesha arintu ka dhacday. Waxaa kale oo larabaa in dacwadan la qaado mudo Shan maalmood gudahood ah iyadoo tirada laga bilaabayo maalinta dacwadda la diiwaan geliyay.Waxaa kale oo sharciga lagu cadeeyay, in aan dacwad ku saabsan ku xadgudub xuquuq shaqaale oo dhacday lix bilood ka hor marka gudiga la horkeenayo ama dhibanuhu qoraal keeda soo gudbiyay iyadoo lix bilood kasoo wareegtay aanay shaqay nayn sababtoo ah wakhtigii ayaan ka dhacay, hadii uuna qofka cabanayaa ahayn askari ka tirsan ciidamada sidaa darteedna ayna arintaasi suurta gal u ahay,sidaa darteed qofkan waxaa tirada lixda bilood looga bilaabayaa maalintii askarta laga ruqseeyay. Cabasho kasta oo naacan oo kale ah waxaa laga yaabaa inay wax ka badalaan qofka ama hay’ada dacwadan dhegaysanaysa ama gudiga sare kaas oo ah mid aad uga fiirsanaya goor kasta inta uuna amarka bixinin. Intaa ka dib qofkii arintan ku qanci waaya ee cabasho ka qabaa wuxuu xaq u leeyahay inuu waydiisto jawaab ku saabsan dacwadii hore iyo midii dambe ee wax laga badalayba waxaa ka luu xaq u leeyahay inuu maxkamada horteeda yimaado oo uu warbixin bixiyo isagoo maxkamada horteeda jooga ama isagoo maqan jawaabta helo. Waxaa kale oo dhici karta in iyagoo aad uga fiirsanaya xubnaha, ama hay’adaha dacwada dhegaysanayaa ama gudiga sare inay u ogolaadaan qofkasta oo raba inuu cadayn keeno ama soo farageliyo waxna ka yidhaahdo dacwada. Dacwo kasta oo noocan ah oo la qaadayo waa in loo qaado si waafaqsan ama sida suurto gal ah ee ugu dhow sharciyada cadaymaha ee maxkamada dawlada dhexe ee maraykanka ee heer degmo kaas oo hoos imanaya sharciyada madaniga ah ee maxkamada dawlada dhexe ee maraykanka ee heer

degmo kaas oo ay ansixisay maxkamada ugu saraysa dalka maraykanka kaas oo lambarkiisu yahay 2072 ee ciwaanka 28, ee sharciga maraykanka [qaybta 2072 ee ciwaanka 28].

**(c) [Qoraal lagu soo gaabinayo cadaymaha, natiijooyinka iyo amarada gudiga sare]** warbiximaha cadaynta ah, ee ay qaadaan xubnaha, hay'addaha ,ama shakhsiyada kale ee u xilsaaran arintan ama gudiga sare waa in lagu soo gaabiyo qoraal kadibna lagu wareejiyo gudiga sare. Intaa kadib waxaa laga yaabaa in gudiga sare iyagoo aad u taxadaraya ogaysiisna bixinaya inay ururiyaan cadaymo dheeraad ah ama ay dhegaystaan dacwada labada dhinac. Isla markaa hadii cadaymuhu u bataan in qofka la dacwaynayaa uu sameeyay ama uu hada samaynayo arin ku xadgudub xuquuq shaqaale, gudiga sare waa inuu sheego natiijada ku saabsan baadhitaankii uu sameeyay kadibna uu bixiyo amar uu ku amrayo qofka xadgudubka sameeyay inuu joojiyo arimaha ku xadgubka xuquuqda shaqaalaha.

## SHARCIGA HEER QARAN EE XIRIIRKA GUUD EE SHAQAALAHA

Iyo in la qaado talaabo wanaagsan oo ay ka mid tahay in shaqaalaha shaqadoodii lagu celiyo iyadoo magdhaw la siinayo wakhtigii ay shaqada banaanka ka joogeen ama magdhow la'aan ay shaqadoodii ugu noqdaan iyadoo la fulinayo amarada sharcigan [cutub hoosaad]: Waxaa kale oo sharcigan lagu cadeeyay, hadii amar lagu bixiyo in shaqaale shaqadiisii lagu celiyo inay suurta gal tahay in loo shaqeeyaha ama urur shaqaale la waydiisto inuu bixiyo lacagtii ka baaqatay shaqaalaha intii uu shaqada ka maqnaa iyadoo laga yaabo in qofkaasi uu yahay dhibane lagu sameeyay takoorid ah: waxaa kale oo sharcigan si dheeraad ah loogu faahfaahiyay, in lagu ogaado in cabashooyinku ay noqon karaan kuwo loo aqaansado in la jebiyay sharciga qaybta iyo in kale 8(a)(1) ama qaybtan 8(a)(2) [qayb hoosaadkan (a)(1) ama (a)(2) ee qaybta 158aad ee ciwaan kan], iyo in marka go'aan laga qaadanayo kiiskan oo kale waa in sidiisa loo raaco sharciga iyadoon loo eegayn in urur shaqaalaha ay arintani saamynasaa uu xidhiidh la leeyahay ururka guud ee shaqaalaha ee heer qaran ama heer caalam iyo inkale ,amaradan oo kale waxaa laga yabaa inay qofka si dheeraad ah uga codsadaan inuu marka mudo kasoo wareegtaba uu keeno warbixin tusaysa ilaa xad sida uu amarkan u fuliyey ama u raacayo.Hadii marka ugu horaysaba guud ahaan cadaymaha la siiyay gudiga sare aanay ahayn fikradihii ama cadaymihii uu qofka lagu magacaabay cabashadu bixiyay ama warbixin uu bixiyay qof wakhtiga xaadirka ah ka qayb qaadanaya xadgudub xuquuqda shaqaalaha, gudiga sare waa inuu sameeyo baadhitaan xaqiiqo raadin ah kadibna go'aan kiisa soo saaro go'aankaas oo ah mid uu ku joojinayo dacwada waxaa kale oo sharcigan ku cad in gudiga sare aanu soo saari karin amar odhanaya waa in lagu celiyo shaqadiisa ama la siiyo lacag magdhaw ah qof shaqaale ah oo shaqadiisa laga eryay ama looga joojiyay si ku meel gaadh ah sababtuna looga eryayna ay tahay mid sharci ah. Tusaale hadii cadayn arintan ku saabsan la hor keeno xubin ka tirsan gudiga sare ama qaadi katirsan qaadiyada maamulka qaaliyada ama koox qaaliyo ah waxaa laga rabaa xubinta gudiga sare iyo qaaliyadaba hadba kii arinta la horkeenaa inuu xukumo in sababta qofkaa lagu eryay ay tahay mid sharciya kadibna inuu gudiga sare warbixin siiyo kadibna xukun kani wuxuu noqonayaa mid sharci ah hadii mudo labaatan maalmood gudahooda uuna racfaan lagaga qaadan.
[Ciwaanka odhanaya "maamulka qaadlyada sharciga" waxaa lagu meel mariyay sharcigan 5 U.S.C. § 3105.]

**(d) [wax ka badalida natiijooyinka baadhitaanada ama amarada ka hor inta aan laga diiwaan gelin maxkamada].** Ilaa inta aan cadaynta dacwada loo gudbinin maxkamada sida sharcigan ku cad gudiga sare wuxuu awood u leeyahay inuu ku samayn karo wax ka badalid macquul ah iyadoo isla markaana gudiga sare looga baahan yahay inuu bixiyo ogaysiis uu ku

sheegayo inuu cadaynta wax ka badalayo ama uu dhamaam ama qayb cadaynta ka mid ah inuu tuurayo.

**(e) [Codsi loo qoranayo maxkamad kaas oo lagu waydiisanayo inay amar fuliso sida; qaadida dacwadaha; iyo dib u eegida xukumada]** gudiga sare waa inuu leeyahay awood uu racfaan ku waydiisan karo maxkamad kasta oo kutaala maraykanka ama hadii maxakamada uu rafcaanka waydiistay uu shaqaalaheedu fasax ku maqan yahay maxkamad kasta oo heer degmo ah oo ku taala maraykanka iyadoo mudnaanta koowaad la siinayo maxkamada ku taala meesha ay ka dhacday ku xadgudubka xuquuqda shaqaaluhu ama meesha qofka dacwada qabaa uu ku nool yahay ama uu ganacsi ku leeyahay. Isla markaa fulinta sharciyada noocan ah iyo bixinta amar si aan joogto ahayn loo sii daynayo eedaysanaha ama amar ah in amaan la siiyo dhibanaha iyo diiwaan gelinta dacwada laga diiwaan gelinayo maxkamada si dacwadaa maxkamad loo horkeeno.

## SHARCIGA HEER QARAN EE XIRIIRKA GUUD EE SHAQAALAHA

Sida uu qabo sharciga lambarkiisu yahay2112 ee ciwaanka 28, ee sharciga maraykanka [qaybta 2112 ee ciwaanka 28aad].Ka hor inta aanay maxkamadu gudbin codsiga qofka lagaga codsanayo inuu qofku maxkamad ku horyimaado waa inay haysataa sabab wanaagsan oo qofka loogu diri karo codsi noocan ah. Waxaa kale oo maxkamada laga rabaa inay leedahay awood sharci ah oo ay kiiskan ku dhegaysan karto isla markaana ay ku go’aamin karto su’aasha ka taagan kiiskan. Waxaa kale oo laga rabaa inay leedahay awood ay si ku meel gaadh ah ugu sii dayn karto eedaysanaha ama ay ku bixin karto amar ah inay labada dhinac is amaan geliyaan inta aan arinta maxkamad la hor keenin iyo inay bixiso amar ayku meel marinayso xukkanka ay rido iyo inay meel mariso wax ka badalida ay wax ka badasho cadaymaha ama inay leedahay awood ay ku joojin karto dhamaan ama qayb ka mid ah amarada gudiga sare. Hadii ayna jirin wax cabasho ah oo laga sheegay gudiga sare hortiisa ama xubno ka mid ah xubnaha gudiga sare hortooda,ama hay’ad ka tirsan hay’adaha hawlahan oo kale u xilsaaran ma aha in maxkamada la horkeeno cabashooyinkaas, hadii ayna jirin arin lagu guul daraystay ama si ula kac ah arintan loo qariyey ama arinta cabashada dhegaysigeeda markii hore laga cudurtaay sababo aan caadi ahayn oo markaa taagnaa dartood. Waxaa kale oo la rabaa in natiijooyinka ka soo baxa baadhintaanada uu sameyoo gudiga sare ee khuseeya su’aalaha ku saabsan xaqiiqo raadinta mar kasta waxaa muhiim ah in hadii cadaymahaa la raacayo inay cadaymahaasi noqdaan cadayn wayn oo ka jawaabaysa su’aalaha kiiska ka taagan ahna mid dhamaystiran oo sideeda loo wada qaadan karo. Hadii labada qolo ee is dacwaynaya midkood codsado inuu keeno cadaymo dheeraad ah oo dhaar iyo wax la mid ah iyagoo isla markaa maxkamada tusiyana arimo macquul ah oo ay u suurto geli wayday inuu markii hore cadaytan hor keeno gudiga sare ama xubno ka tirsan gudiga sare ama hay’adaha kale ee dacwadaha dhegaysta waxaa laga yaabaa inay maxkamada amarto in cadaytan la hor geeyo gudiga sare ,ama xubno ka tirsan gudiga sare ,ama hay’adaha kale ee dacwadaha dhegaysta laguna daro cadaymaha maxkamada la horkeenayo ee diiwaan gashan. Waxaa kale oo laga yaabaa in gudiga sare wax ka badalo natiijooyinkii ka soo baxay baadhitaanadii uu hore u sameeyay,ama uu sameeyo baadhitaano cusub si uu natiijo cusub oo xaqiiqada ku dhisan u helo hadii ay helaan cadaymo ama xog dheeraad ah oo ayna hore u haynin isla markaana waxaa laga rabaa inay diiwaan geliyaan qaataana cadaymaha cusub ku waas oo ka jawaabaya su’aalaha ka taagan kiiska isla markaana ah cadaymo dhamaystiran oo aan wax khalad ahi ku jirin. Waxaa kale oo la rabaa inay diiwaan geliyaan talo soo jeedintooda, hadii ay wax ka badaleen ama ay ka saareen qayb ka mid ah amaradii ay hore u bixiyeen. Marka ugu horaysa ee cadaymaha gacanta laga geliyo maxkamada waa in ay maxkamadu noqoto awooda

keliya ee gacanta ku haysa cadaymaha xukunka ay ridaana uu noqdo mid kama dambays ah marka laga reebo in hadii rafcaan kiiskan laga qaato oo codsi loo gudbiyo maxkamada heer degmo ee dawlada maraykanka  inay maxkamada rafcaanada ee dawlada maraykan ku ay xaq u leedahay inay dib u eegto kiiskan iyo sida sharcigani sheegayo hadii rafcaan loo qaato maxkamada ugu saraysa dalka maraykanka kadibna ay bixiso amar ama sharciyayn ay sharciyayso in maxkamdaha hoose ay kiiska mar kale dhegaystaan iyadoo la raacayo sharciga qaybta 1254 ee ciwaankan 28.

**(f) [Codsi racfaan qaadasho ah oo maxkamad lagu waydiisanayo inay dib u eegto amarka ugu dambeeyaya ee gudiga sare bixiyay]** qofkasta oo wax yeelo kamsoo gaadho ama  ay cadho geliso amarka ugu dambeeya ee gudiga sare bixiyo kaas oo u diidaya ama ka hor istaagaya qayb ama dhamaan wixii uu u malaynayay inuu xaq u leeyahay wuxuu ka codsan karaa maxkamad kasta oo rafcaan oo ku taala dalka maraykanka siiba meesha ayka dhacday ku xad gudubka xuquuqda shaqaalaha ama uu ku nool yahay qofka dacwada qaba ama uu ganacsi ku leeyahay ama maxkamada rafcaanada ee degmada Columbia isagoo u qoranaya codsi uu ku waydiisanayo in maxkamada ay dib u eegto xukunkaa lagu riday,kadibna ilaahay ka baryaya in wax laga badalo go’aankii gudiga sare ama dhamaan in la tuuro. Waxaana la rabaa in sawirka warqada codsiga ah ee dhibanuhu ku codsanayo in kiiskiisa dib loogu eego uu karaaniga maxkamadu u diro gudiga sare isla markaana waxaa laga rabaa qolada cabashada qabtaa inay maxkamada ka diiwaan geliso kiiskii ay ansixiyeen gudiga sare si marlabaad maxkamadu dib ugu eegto loo dhegaysto arintaas oo ku cad sharciga qaybta 2112 ee ciwaankan  28, ee sharciga dalka maraykanka [qaybta 2112 ee ciwaankan 28]. Marka codsigan rafcaanka ah la soo gudbiyo waxaa maxkamadana laga rabaa inay si degdeg ah u eegto kiiskan

## SHARCIGA HEER QARAN EE XIRIIRKA GUUD EE SHAQAALAHA

Arinta ku saabsan codsiga ay gudiga sare dirayaan ee hoos imanaya sharci hoosaadka (e) ee qaybtan gudaheeda,waa inuu yahay mid maxkamada siinaya awood sharci ah oo la mid ah awooda gudiga sare  si ay maxkamadu si ku meel gaadh ah u sii dayn karto qof xidhan ama uu ku bixin karto amar ah in ay labada dhinac is nabad geliyaan oo ayna isku xad gudbin inta arintooda laga xalinayo, isla markaana iyadoo maxkamadu sida gudiga sare oo kale  si wanaagsan oo sax ah uga fakirayso arintan ,iyo in sidoo kale maxkamada leedahay  awood ay wax kaga badali karto cadaymaha isla markaana ay ku meel marin karto waxka badalida ay samaysay ama in maxkamadu leedahay awood ay ku baabi’in karto qayb ama dhamaan  amarka uu gudiga sare bixiyey; waxaa kale oo la rabaa in natiijooyinka uu gudiga sare gaadho ee ku saabsan xaqiiqo raadinta,hadii loo helo cadaymo waawayn oo taageeraya xaqiiqada ay soo bandhigeen inay tahay mid sax ah ,waa inay tahay xaqiiq dhamaystiran oo aan wax kale loo raadinayn .

**(g) [Qaababka maxkamaduhu u shaqeeyaan, marka la sugayo amarka gudiga sare ]** bilaabida hawlaha maxkamada ee hooos imanaya sharciga qayb hoosaadka (e) ama (f) ee qaybtani maaha inuu bilowdo,hadii ayna si gooni ah ayna maxkamadi u amrin,waxaa la sugayaa inta gudiga sare amar lagu bilaabo ka bixinayo.

**(h) [xadidaada uu qorayo cutubka 6aad ee ciwaankani wax saamayn ah kuma yeelanayso awooda sharci ee maxkamadaha ].** Marka la samaynayo sii dayn ku meel gaadh ah oo sharciga waa faqsan ama la bixiyo amar ah in laba kooxood oo is hayaa is amaan geliyaan lagu amrayo ama,la bixinayo amar lagu meel marinayo xukun dhacay ,ama la meel marinayo wax ka badalid cadaynta wax laga badalay,ama dhinac layska dhigayo qayb ama dhamaan amar uu gudiga sare bixiyay, sida lagu cadeeyay sharcigan si ay maxkamadu xukunkeedu u noqdo mid cadaalad ah

awooda sharci ee maxkamadu ay leedahay waa in aanu noqon mid uu xadido sharciga qaybta 101 ilaa 115 ee ciwaankan 29aad, ee sharciga maraykanka [cutubka 6aaad ee ciwaanka] [ sharcigaas oo loo yaqaano sharcigii"Norris-LaGuardia "]

**(i) Joojin arin si buuxda loo joojiyiyey.**

**(j) [Amar qof ama dad badan lagu amrayo inuu wax uu samaynayey joojiyo ama lagu amrayo inuu sii wado ]** marka hore waxaa laga rabaa in gudiga sare leeyahay awood uu waxyaalahan oo kale ku samayn karo inta uuna qofna dacwad ku soo oogin sida lagu cadeeyay sharciga qayb hoosaad kan (b) [ee qaybtan dhexdeeda ] inta aanu gudiga sare qofna ku eedayn inuu sameeyey ama hadda samaynayo ku xad gudub xuquuq shaqaale,ama aanu codsi rafcaan ah wadiisan maxkamad madani ah oo dawlada dhexe ee maraykanku leedahay oo ku taala degmada uu xadgudubka xuquuqda shaqaaluhu ka dhacay ama meesha uu qofka lagu xad gudbay degan yahay ama ganacsi ku leeyahay,ama awood uu si ku meel gaadh ah qof ugu sii dayn karo ama uu ku bixin karo amar ah in labada qolo ee is hayaa ay is nabad geliyaan inta arintooda laga xalinayo. Inta uuna gudiga sare samayn codsiyada noocan oo kale ah maxkamadu waa inay heshaa sabab maquul ah oo qofkaas loogu diri karo ogaysiis uu maxkamad ku hor yimaado,intaa waxaa raacda in loo baahan yahay in maxkamadu leedahay awood ay gudiga sare ku siin karto awood sharci oo u ogolaanaysa in gudiga sare si ku meel gaadh ah u sii dayn karo dadka qaarkii ama uu bixiyo amar ah in labada dhinac ee is hayaa ay is amaan geliyaan inta arintooda laga xalinayo iyadoo gudiga sare arintaa si fiican uga fiirsanayo.

**(k) [Dhegaysiyada maxkamadaha ee ku saabsan sharci ahaanta shaqo joojinaha]** markasta oo qof lagu soo eedeeyo inuu sameeyay ku xad gudub xuquuq shaqaale iyadoo loo fiirinayo macnaha sharciga ku qoran faqrada (4)(D) ee qaybtan 8(b) [aybta 158(b) ee ciwaankan], gudiga sare waxaa awood loo siiyay inuu dhegaysto dacwada iyo inuu ogaado go'aan ka gaadho arinta ay ka kacday khilaafka keenay ku xadgudubka xuquuqda shaqaalaha hadii ayna toban maalmood kadib marka la bixiyay ogaysiiska ah in eedayno la horgeeyay gudiga sare aanay labada dhinac ee is hayaa u keenin gudiga sare cadayn lagu qanci karo oo tusaysa inay xaliyeen khilaafkii u dhexeeyey labada dhinac ama aanay keenin arimaha ay ku heshiiyeen ee labada dhinacba aqbaleen iskuna waafaqeen si ay khilaafka u xaliyaan. Markaa hadii labada dhinac ku qancaan go'aanka uu gudigu ku xalinayo khilaafka ,ama marka ay labada dhinac iskood u heshiiyaan eedaymaha oo dhan waa in la tuuro.

**(l) [Cuna qabatayno iyo shaqo joojino loo samaynayo si loo aqoonsado urur shaqaale aan sharciyaysnayn iyo amaro lagu bixinayo wadida ama joojinta fal khaas ah iyo dib u soo celinta sharciga]** markasta oo qof lagu soo eedeeyo inuu sameeyay ku xad gudub xuquuq shaqaale iyadoo loo fiirinayo macnaha sharciga ku qoran faqrada.

## SHARCIGA HEER QARAN EE XIRIIRKA GUUD EE SHAQAALAHA

(4)(A), (B), ama (C)ee qaybtan8(b) [qaybta 158(b) ee ciwaankan], ama qaybta 8(e) [qaybta 158(e) ee ciwaankan] ama qaybta 8(b)(7) [qaybta 158(b)(7) ee ciwaankan], baadhitaanada u horeeya ee eedaymahan noocan ah waa in loo sameeyo si degdeg ah waana in mudnaanta koowaad laga siiyo kiisaska kale oo dhan waxaan ka ahayn kiisaska kale ee la mid ka ah ee iyagana laga diiwaan geliyey xafiiska kiiskan loo diray. Hadii marka baadhitaankan la sameeyo kadib sarkaalka ama garyaqaanka guud ee gobolka ay arintu ka dhacday kaas oo ah ka arinta loo xilsaaray uu helo sabab wanaagsan oo uu ku rumaysto inay eedaymahani yihiin kuwo run ah loona baahanyahay in eedaynta la diiwaan geliyo, isla markaa waa in isagoo matalaya gudiga sare uu u diro codsi ah inay dacwada dhegaysato , maxkamadkasta oo heer degmo ah oo dawlada dhexe ee maraykanku leedahay oo ku taala goobta ay ka dhacday ku xad gudubka xuquuqda

shaqaaluhu,ama meesha isku dayga ku xadgudubku xuquuqda shaqaaluhu ay ka dhacday,ama meesha dhibanuhu degan yahay ama uu ganacsi ku leeyahay isla markaa waxaa laga rabaa inuu sameeyo arin ku haboon oo uu dib ugu dhigayo in mudo ah arinta la xidhiidha dhex dhexaadinta labada dhinac ee uu gudiga sare go'aanka kama dambaystaa uu ku gaadhayo. Marka u horaysa ee codsigan oo kale loo soo gudbiyo maxkamada degmada waa inay leedahay awood sharci ah oo ay kiiskan si ku meel gaadh ah dib ugu dhigi karto ama ay ku bixin karto amar in labada dhinac is amaan geliyaan inta arintooda laga xalinayo iyadoo arimahan si wanaagsan oo cadaalad ku dheehantahay uga fikiraya isla markaana aan fiirinayn qayb kasta oo kale oo sharci ahi waxa ay arintan ka qabto. Waxaa kale oo halkan si dheeraad ah loogu cadeeyay in aan la ogolayn in labixiyo amar ku meel gaadh ah oo loogu sheegayo in labada dhinac ay is nabad geliyaan iyadoon ogaysiis la bixin hadii uuna codsiga rafcaanka lagu dalbanayaa ahayn mid sheegaya in dhaawac wayn oo aan ka soo kabasho lahayn uu soo gaadhayo qolada la soo eedeeyay,dhawacaas oo ah mid aan si naba looga nabad gelayn ka dib marka xaaladan darteed loo bixiyo amarka ah in labada dhinac is amaan geliyaan in mudo ah waa inayna mudadaasi amarkani shaqaynayaa aanay ka badan shan maalmood ka dibna wakhtigeedu halkaa ku dhamaado. Waxaa kale oo iyadana halkan si dheeraad ah loogu cadeeyay in aan la ogolayn in sarkaalka noocaas ah ,ama garyaqaanka gobolku inay bixin karin amarka ah in labada dhinac is amaan geliyaan in mudo ah iyagoo adeegsanaya sharciga qaybtiisa8(b)(7) [qaybta 158(b)(7) ee ciwaankan] hadii eedaynta ka dhinaca ah loo shaqeeyaha ee hoos imanayso sharciga qaybtiisa 8(a)(2) [qaybta 158(a)(2) ee ciwaankan] maxkamada loo gudbiyay,markii baadhitaankii u horeeyay la sameeyay ka dib sarkaalka ama garyaqaanku wuxuu haystaa sabab macquul ah oo uu ku rumaysto inay eedaymahani yihiin kuwo run ah isla markaana waa inuu cabasho u gudbiyo maxkama isla marka u horaysa ee codsigan oo kale maxkamad la horgeeyo ,maxkamadu waa inay heshaa sabab macquul ah oo ay ugu dirto ogaysiis inuu qofkasta oo eedayntan ku lug lihi maxkamad ku hor yimaado iyadoo lagu darayo qolada eedaysan waana in la siiyo fursad ay qolo waliba kula kulanto la taliye oo ay ku soo bandhigto cadayn kasta oo la xidhiidha kiiska. Waxaa kale oo iyadana halkan si dheeraad ah loogu cadeeyay qayb hoosaadka sharcigan in iyadoo u jeedadu tahay in maxkamada heer degmo ay yeelato awood sharci ah oo ay ku maamusho ururada shaqaalaha, (1)iyadoo ku maamulaysa degmada ururka xafiiskooda wayni ku yaalo , (2) ama degmo kasta oo uu joogo sarkaal shaqada yaqaana oo si sharci ah loo magacaabay ama xubin ka mid ah urur shaqaalaha oo dadka ku dhiiri gelinaya inay xubin noqdaan isla markaana difaacaya danaha shaqaalaha xubnaha ka ah urur shaqaalaha. Sharci ahaana shaqo kasta oo uu qabto sarkaalka ama xubinta urur shaqaalaha ka socdaa sharcigan waxay la mid tahay in urur shaqaaluhu shaqadaa sameeyay waana lagu dacwayn karaa. marka ay xaaladu sidaa u dhacdo ee la dacweeyo urur shaqaale waa in la raaco sharciga lagu cadeeyay qaybtan 8(b)(4)(D) [qaybta 158(b)(4)(D) ee ciwaankan].

**(m) [Sida ay kiisasku u kala muhiim sanyihiin]**wakhti kasta oo lagu soo eedeeyo in qof sameeyay ku xad gudub xuquuuq shaqaale marka la eego sida uu qabo sharci hoosaadka (a)(3)ama (b)(2) ee qaybtan 8 [qaybta 158 ee ciwaankan], eedaymaha noocan oo kalaa waa in la siiyo muhimada koowaad iyadoo laga hor marinayo kiisaska kale oo dhan marka laga reebo kiisaska iyaguna kiiskan la midka ah ee iyagana laga diwaan geliyay ama loo diray xafiiska kiiskan loo diray iyo kiisaska uu mudnaanta gaarka ah siinayo sharci hoosaadkani(1) [ee qaybtan guda heeda].

## SHARCIGA HEER QARAN EE XIRIIRKA GUUD EE SHAQAALAHA
## AWOODA WAX LAGU BAARO

**QAYBATA. 11. [§ 161.]** Ujeeda laga leeyahay dhamaan dhegaysiga kiisaska iyo baadhitaanada kuwa sida gudiga sare qabo ee muhiimka ah isla markaana haboona in la sameeyo si loo adeegsado awooda uu xaqa u siinayaan sharciga qaybihiisa kale 9 iyo qaybta 10 [qaybaha 159 iyo 160 ee ciwaankan]—

**(1) [Diiwaan gelinta Cadaymaha, u yeedhida markhaatiyada iyo qaadida ama dhegaysiga warbixinta cadaymaha]** gudiga sare, ama wakiilada kale ee sharciga ah ee uu dirsado, waa in la siiyo wakhti ku filan oo macquul ah iyadoo ujeedada loo siinayaa ay tahay inay kaga baaraan degaan, nuqula kaga qaataan cadayn kasta oo ku saabsan baadhitaan lagu sameeyay qof kiisku ku socdo ama qof uu soo galay raad baadhitaanka ku saabsan ama su'aalo la waydiiyay. Kadibna gudiga sare ama xubnihiisa waxaa laga rabaa inay u diraan qolo kasta oo arinta ku lug leh warqad lagu waydiisanayo inay ka soo qayb galaan  dhegaysiga warbixinta,isla markaana iyagoo keenaya cadaynkasta oo ay hayaan dhegaysanayana cadaymaha ay markhaatiyadu bixinayaan ama soo bandhigida cadaymo kale oo khuseeya baadhitaanka iyo kiiska guud ahaan. Marka  ay shan maalmood ka soo wareegto ama shan maalmood gudahood wakhtigii loo diray warqadaha lagu waydiisanayo qofkasta oo laga rabo inuu keeno cadaymaha uu hayo ama awoodiisa hoos yimaada,qofka warqada loo diray hadii uu rabo wuxuu gudiga sare waydiisan karaa inay gudiga sare joojiyaan yeedhida maxkamada looga yeedhayo ,gudiga sarena waa inay arintaa sameeyaan joojiyaana ,u yeedhida qofkaa maxkamada looga yeedhayo hadii uu gudigu u arko in cadaymaha qofkan la waydiinayaa aanay ahayn kuwo aan sinaba wax xidhiidha ula lahayn arimaha baadhitaanka lagu hayo,ama uu gudigu u arko inuu yahay mid aan wax xidhiidh ah la lahayn su'aalaha arintan ka taagan ama uu arko in warqada qofka loo diray aanay si wanaagsan u sharaxayn cadaymaha laga rabo qofka warqada loo diray inuu keeno. Xubinkasta oo ka tirsan gudiga sare ama wakiil iyo hay'ado kasta oo gudiga sare u xilsaaray inay hawlahan fuliyaan waxay samayn karaan hadii ay rabaan inay dadka dhaariyaan iyo inay arrin kale xaqiijiyaan,waxaa kale oo ay imtixaami karaan markhaatiyada ,cadaymahana way ururin karaan. ka soo qayb galka noocan  ah ee markhaatiyaashu imanayaan iyo keenida cadaymuhu waxaa laga codsan karaa meel kasta oo ka tirsan wadanka maraykanka ama maamul kasta oo madax banaan oo hoos yimaada dawlada dhexe ee maraykanka ama meelkasta oo lagu qabanayo dhegaysiga noocan oo kale.

**(2) [Gacanyarayaasha maxkamada iyo dadaalkooda ah ururinta cadaymaha iyo dhiirigelinta imaanshaha markhaatiyada]** tusaale ahaan hadii ay dhacdo in qof loo diray warqad lagaga codsanayo inuu maxkamad ku horyimaado uu diido ,warqadaas oo ay u dirtay maxkamad kasta oo madani ah oo heer qaran ah oo ku taala dalka maraykanka ,ama maxkamadaha kale ee maraykanka ee ku yaala mamulada hoos yimaada dawlada maraykanka ama maxkamad uu leeyahay gobol ka tirsan gobolada maraykanku oo ku taala meesha baadhitaanku ka dhacay ama meesha laga helo ama uu degan yahay qofka amardiida sameeyay ama uu ganacsi ku leeyahya marka u horaysa waxaa gudiga sare laga rabaa inuu leeyahay awood sharci ah oo uu qofkaa ugu diro karo warqad uu gudigu ku amrayo in qofkaasi horyimaado, gudiga sare xubin ka mid ah xubnaha gudiga sare ama hay'ad ama qofkale oo arintan qabankara isla markaana uu cadayn keeno hadii lagu amro inuu sidaa sameeyo,ama uu bixiyo warbixin taabanaysa arinta baadhitaanku ku socdo ama ay su'aashu ka taagan tahay ,markaa hadii uu ku guul daraysto inuu adeeco amarkaas maxkamada ka soo baxay waxaa laga yaabaa in la ciqaabo qofkaas iyadoo la raacayo sharciga maxkamadaas iyo sida uu u ciqaabayo qofka sidan oo kale **(3) ka noqosho.**

[damaanad sharci ah  oo la siinayo markhaatiyada. Fiiri18 U.S.C. § 6001 et seq.]

**(4) [Nidaam, adeeg gaarsiin ah oo la xaqiijinayo inuu qofkii gaadhay iyo kharashyada ku baxa markhaatiyada]** Cabashooyinka,amarada iyo nidaamyada kale iyo qoraalada ay sameeyaan, gudiga sare,xubno ka mid ah gudiga sare ,wakiil,ama hay'adaha waxaa laga yaabaa in gacanta laga dhiibo ama boostada la dhigo iyadoo la isticmaalayo habka diiwaan gelinta habkaas oo ah mid lagu hubinayo inay warqadu gaadho qofkii loogu tala galay,ama waxaa lagu diri karaa telegraph ama waxaa warqad la dhigi karaa xafiiska wayn ee gudiga sare ama ganacsi uu leeyahay qofka warqada loo dirayaa.

**SHARCIGA HEER QARAN EE XIRIIRKA GUUD EE SHAQAALAHA**

Hubinta ama xaqiijinta inay warqadaasi gaadhay qofkii loo diray waa in lagu xaqiijiyo helidda ama soo noqoshada risiitkii boostada ama kii telegraphka, sidoo kale marka la diiwaan geliyo ee boostada lagu diro ama telegraphka lagu diro iyagana waa in lagu xaqiijiyo helida risiitka. Markhaatiyada loogu yeedho inay hor yimaadaan gudiga sare, xubno ka tirsan gudiga sare ama hay'ado waa in la siiyo lacag la mid ah lacagta ay siiso maxkamada dawlada dhexe ee maraykanku  marka ay  markhaatiyadeeda siinayso kharashyada iyo masaafada ay socdeen, sidoo kale  markhaatiyada warbiximaha siiya  gudiga sare ,waa in iyagana la siiyo lacag la mid ah lacagta la siiyo markhaatiyada warbiximaha siiya maxkamadaha dawlada dhexe ee maraykanka

**(5) [Nidaamyada iyo meelaha ay ka shaqeeyaan] Codsi** kasta oo loo qortay Nidaam kasta oo maxkamadeed, iyadoo sharcigan la raacayo [cutub hoosaad] waxaa laga yaabaa inuu ka shaqeeyo maxkamadaha sharciga ah  ee ku yaalla degmooyinka uu eedaysanaha ama qofka kale ee larabo in wax loo qabtaa uu ku noolyahay ama isagoo socda laga helo.

**(6) [Warbixinta iyo caawimaada ka timaada laamaha dawladda ]**marka madax waynuhu amro in dhawr laamood ama hay'adood oo dawlada ka tirsani ay siiyaan gudiga sare ,marka ugu horaysa ee gudiga sare uu codsiga sameeyo, dhamaan cadaymaha,qoraalada iyo warbiximada kale ee ay hayaan ee la xidhiidha arinta whakhtigaa gudiga sare hortaala.

**qaybta. 12. [§ 162. Dembiyada iyo ciqaabaha]** qofkasta oo si ula kac ah, uga horyimaada, joojiya ,hakiya ama hor istaaga xubin ka tirsan gudiga sare ama wakiil ka tirsan wakiilada gudiga sare ama hay'ad inay qabsato shaqadeeda iyadoo la raacayo sharcigan  [cutub hoosaad] waa in lagu ciqaabaa inuu bixiyo ganaax aan ka badnayn $5,000 ama inla xidho xadhig aan ka badnayn hal sano ama labadaba laysugu daro.

XADIDAADAHA

**Qaybta. 13. [§ 163. Ilaalinta la ilaaliyay xuquuqda ah in shaqo joojin la samayn karo]** Majiro wax sharcigan ka mid ah [subchapter], oon ka ahayn waxyaalaha sida khaaska ah halkan loogu magacaabay oo loo fasiran karo inuu sinaba u hor istaagayo,u hakinayo ama hoos u dhigaya xuquuqda ay shaqaaluhu u leeyihiin inay shaqo joojin sameeyaan ama saameyn ku yeelanaya heerka awoodeed ama sharci ahaaneed ee xuquuqdaas.

**Qaybta. 14. [§ 164. Dhisida xaalada sharci ee] (a) [ee u ogolaanaysa in korkala socde goob shaqo noqodo xubin urur shaqaale ]**Majiro wax sharcigan lagu sheegay oo ka mamnuucaya in qof loo shaqaaleeyay kor kala socode ahaan inuu xubin ka noqdo ama xubin kasii ahaado urur shaqaale laakiin lama ogola in loo shaqeeye sharcigan hoos yimaada [cutub hoosaadkan] lagu khasbo inuu u aqoonsado korkala socdayaasha halkan lagu sheegay inay yihiin shaqaale sharci ah oo ka socda urur shaqaale ha ahaato heer qaran ama heer gobol  marka laga hadlayo arinta ku saabsan gorgortanka dhexmara shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha

**(b) [Heshiisyada ku xidhiya ka mid noqonshaha urur shaqaale arin jebinaysa sharciga gobolka]** Majiro wax sharcigan ka mid ah [cutub hoosaadkan] oo loo fasiran karo inay

sharciyaynayso ama hirgelinayso heshiis isku xidhaya xubin ka noqoshada urur shaqaalaha iyo shaqo siinta qofka gobolkasta oo maraykan ah ama maamulkasta oo madaxbanaan oo hoos yimaada dawlada mararykanka kaas oo sharciga u yaalaa arintan diidayo.

**(c) [Awooda gudiga sare ee uu ku diidi karo awooda sharci ee ay leeyihiin maxkamadaha gobolada iyo maamulada madaxa banaani marka laga hadlayo khilaaf ka u dhexeeya shaqada iyo shaqaalaha]** (1) waxaa laga yaabaa iyagoo aad uga taxadaraya inay gaadhaan go'aan sharci ah ama ka taxadaraya sharciyada qoran kuwaas oo lagu meel mariyey sharciga maamulka maxkamadaha in gudiga sare [ilaa cutub hosaadka II ee cutubka 5aad ee ciwaanka 5], ay diidaan inay awoodooda sharci u isticmaalaan khilaaf kasta oo u dhexeeya shaqada iyo shaqaalaha kaasoo ku lug leh noockasta oo loo shaqeeye ah,marka uu gudiga sare u arko inaanu khilaafkani ahayn mid si wayn u taabanaya arimaha ganacsiga sidaa darteed aanu ahayn mid u qalma inay awoodooda sharci adeegsadaan.Waxaa kale oo sharcigan lagu cadeeyey in aan la ogolayn in gudiga sare diido inuu awoodiisa sharci u adeegsado khilaaf kasta oo shaqo iyo shaqaale, kaasoo awoodiisa sharci uu u adeegsanayo isagoo raacaya sharciyada madaniga ah ee la meel mariyay, August 1, 1959.

(2) Majiro wax sharcigan ka mid ah [subchapter] oo lagu rumaysan karo inuu hor istaagayo ama u diidayo in hay'ad kasta maxkamad kasta ama gobol kasta ,ama maamul madax banaan oo kasta (marka lagu daro barwaaqo sooranka Puerto Rico, Guam, iyo the Virgin Islands), inay la wareegto xukumida iyo dhexdhexaadinta khilaafyada shaqada iyo shaqaalaha ee gudiga sare diiday inuu qabto ,isla markaana iyagoo raacaya sharciga faqradiisa (1) ee qayb hoosaad inay awoodooda sharci adeegsadaan .

**qaybta. 15. [§ 165.] waa Laga saaray.**

[cadayn u taagan ka noqosho laga noqday sharciga sheegida caydhnimada.]

**qaybta. 16. [§ 166. Kala saarida qodobada sharciga]** hadii qodob kasta oo ka tirsan sharcigan [cutub hoosaad], ama ku fulinta qodobka noocan ah ee qofkasta ama xaalad kasta loo aqoonsado inay tahay mid aan shaqaynayn inta sharcigan ka hadhay [cutub hoosaad], ama ku fulinta qodobka noocan ah ee dadka ama xaaladaha waxaan ka ahayn kuwa layidhi sharcigani ma qabanayo, maaha inuu wax saamayn ah ku yeesho marka lagu fulinayo dadka iyo xaaladaha kale

**qaybta. 17. [§ 167. ciwaan gaaban]** talaabadan [cutub hoosaad]kaas oo laga yaabo in laga soo qaatay "sharciga heer qaran ee xidhiidhka guud ee shaqaalaha."

**qaybtan. 18. [§ 168.] waa laga saaray.**

[iyadoo loo noqonayo qaybtii hore ee. 9(f), (g), iyo (h).]

DADKA DIIMAHA AAMINSAN

**qaybta. 19. [§ 169.]** qofkasta oo shaqaale ah oo xubin ka ah rumaysana dhaqan, caado iyo diin caan ah oo la yaqaano,ama firqo lagu yaqaano inay taariikhiyan si adag uga soo horjeedo in xubin laga noqdo urur shaqaale ama taageero dhaqaale la siiyo urur shaqaale ,waa in aan shuruud lagaga dhigin inay xubin ka noqdaan urur shaqaale si ay shaqo u helaan marka laga reebo hadii ay dhacdo in shaqaalahaas ay qasab ku tahay inuu saxiixo qandaraas ay wadagaan shaqaalaha loo shaqeeyaha iyo urur shaqaalaha iyadoo qandaraas kaasi yahay in mararka qaarkood laga rabo inuu shaqooyin qabto bixiyana lacag la mid ah lacagta qof walba oo shaqaalaa uu bixiyo marka lagu daro kuwa aan diinta haysan,kuwa aan urur shaqaale ka tirsanayn iyo hay'adaha samafalka ee aan lacagtooda canshuurta laga qaadin sida sharciga qaybtani qabo 501(c)(3) ee ciwaankan 26 ee sharciga dakhliga gudaha [qaybtan 501(c)(3) ee ciwaankan26], oo uu soo doortay shaqaalaha noocan ahi kana soo doortay diiwaanka, ugu yaraan sedex lacagood oo noocan ah kuwaas oo loogu talagalay qandaraasyada noocan ah ama hadii qofka shaqaalaha ah ee wuxuu rumaysanyahay u diidayo uu raacsanyahay sharciga qaybtiisan.

## SHARCIGA HEER QARAN EE XIRIIRKA GUUD EE SHAQAALAHA

Codsiga lagu waydiisanayo ururada shaqaalaha in la isticmaalo nidaamka dhexdhexaadinta cabashooyinka iyagoo matalaya shaqaalaha,ururada shaqaaluhu waxay awood u leeyihiin inay lacag macquul ah waydiistaan shaqaalaha si ay u isticmaalaan nidaamkan.
[qaybta. Lagu daray, la daabacay. L. 93–360, luulyo, 26, 1974, 88 Stat. 397, waxna laga badalay , ladaabacay. L. 96–593, Dec. 24, 1980, 94 Stat. 3452.]

## SHARCIGA MAAMULKA XIRIIRKA GUUD EE SHAQAALAHASHARCIGA MAAMULKA XIRIIRKA GUUD EE SHAQAALAHA

Waxaa kale oo laga soo qaatay LMRA; 29 U.S.C. §§ 141–197
[Ciwaanka 29, cutubka 7, ee sharciga maraykanka]
CIWAAN GAABAN IYO SHAAC KA QAADIDA SHARCIGA

**qaybta 1. [§ 141.]** (a) ee sharcigan [cutubka] kaas oo laga yaabo in laga soo qaatay " sharciga maamulka xiriirka guud ee shaqaalaha." [ Kaas oo loo yaqaano " sharcigii Taft-Hartley."]
(b) dhibaatooyinka ku dhaca warshadaha kuwaas oo lug ku yeesha habsami u socodka ganacsiga iyo wax soo saarka dhamayska tiran ee qoraalada iyo badeecadaha kale,waa kuwo la joojin karo gebi ahaan ama si aad ah loo xadidi karo hadii shaqaalaha, loo shaqeeyaha iyo urur shaqaaluhu iyagoo sharciga ku taagan kana duulaya xidhiidhka ka dhexeeya mid waliba aqooonsado xuquuqda sharciga ah ee midka kale,iyo in mid waliba garaysto arinta ah inaan sharcigu ogolayn inayna midkoodna xaq u lahayn xidhiidhka uu la leeyahay labada kale inuu sameeyo fal ah mid khatar gelinaya caafimaadka dadwaynaha,nabad gelyada ama danta guud.Waa ujeedada iyo macnaha guud ee sharcigan [cutubka], si loo dhiiri geliyo inuu ganacsigu si buuxda u socdo inla ilaaliyo xuquuqaha sharciga ah ee shaqaalaha iyo loo shaqeeyahaba iyo xidhiidhka ka dhexeeya ee taabanaya ganacsiga.markaa si arimahan oo dhan loo fuliyo waa inla hirgeliyo hab isku duba ridan iyo nidaam nabad gelyo ah oo ka hortegaya in labada dhinac mid ka mid ahi uu ku xad gudbo xuquuqda sharciga ah ee midka kale, si loo ilaaliyo xuquuqda shakhsiga ah ee shaqaalaha si aanu urur shaqaaluhu ugu xad gudbin arintaas oo lug ku yeelanaysa arimaha ganacsiga si loo cadeeyo loona mamnuuco falalka ka imanaya xaga shaqaalaha iyo xaga maamulkaba kaa soo raad ku yeelanaya hawlaha ganacsiga isla markaana ah arin u xun danta guud iyo inla ilaaliyo xuquuqda dadwaynaha ee ku xidhiidha khilaafka ,dhexmara shaqada iyo shaqaalaha ee samaynta ku yeelan kara hawlaha ganacsiga.

**CIWAANKA I**, wax ka badalid lagu sameeyay

**SHARCIGA HEER QARAN EE XIRIIRKA GUUD EE SHAQAALAHA**

29 U.S.C. §§ 151–169 (ee kor lagu daabacay)

**CIWAANKA II**

[Ciwaanka 29, cutubka 7, cutub hoosaadka III, sharciga maraykanka]
XALINTA KHILAAFYADA SHAQADA IYO SHAQAALAHA EE WARSHADAHA DHEXDOODA, KUWAAS OO SAAMAYN KU YEELANAYA GANACSIGA; XAALADAHA DEGDEGA AH EE HEER QARAN

**Qaybta. 201. [§ 171. cadayn la cadaynayo ujeedooyinka iyo xeerarka]** waa sharciga dalka maraykanka **ah**
(a) inla helo warshadayn iyo ganacsi degan iyo horumarinta danta guud, caafimaadka iyo nabad gelyada qaranka iyo ilaalinta maslaxda guud ee shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha sida ugu wanaagsan ee danahan oo dhan lagu ilaalin karaa waa in si labada dhinacba ku qanacsan yihiin loo xaliyo khilaafka ka dhex dhaca shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha iyadoo la raacayo nidaamka

ku salaysan shir ay labada dhinac wada galaan iyo gorgortan dhexmara wakiilada shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha.
(b) xalinta arimaha ay isku khilaafaan loo shaqeeyaha iyo shaqaaluhu iyadoo la raacayo habka ah gorgortan ay labada dhinac gorgortamayaan waxaa lagu horumarin karaa in loo diyaariyo si buuxda oo haboon dhismayaasha dawlada ee loogu talagalay heshiisiinta,iyo dhexdhexaadinta iyo in dawladu qaado dhexdhexaadin iskaa wax u qabso ah oo lagu dhiiri gelinayo loo shaqeeyaha iyo wakiilada shaqaalaha inay gaadhaan heshiis waara kaas oo khuseeya qiimaha mushaharka,saacadaha shaqada iyo xaaladaha kale ee shaqada la xidhiidha iyo in laysku dayo wax kasta oo suurto gelinaya inay khilaaf kooda ka heshiiyaan,gaadhaana heshiis wada jir ah oo oo ku yimaada wada xaajood iyo gorgortan ama si kasta oo kale oo lagu xalin karo khilaafka.
(c) Khilaafaadka kale ee laga yaabo inuu ka dhasho labada qolo marka ay wada gorgortamayaan,waxaa lagaga hortegi karaa ama lagu xadidi karaa in dawladu si buuxda u diyaariso dhismayaasha loogu talagalay in wax lagu heshiisiiyo isla markaana caawimo u fidiso loo shaqeeyayaasha iyo wakiilada shaqaalaha matalaya iyadoo isla markaana dawladu diyaarinaysa in lagu daro heshiiska qodob odhanaya waa in wakhti ku filan oo ogaysiis ah la bixiyo markasta oo wax laga badalayo wixii lagu heshiiyey iyo qodobo kale oo ka hortegaya waxyaalaha kale ee khilaaf kicin kara..

**qaybta. 202. [§ 172. Hay'adaha dawlada dhexe u qaabilsan heshiisiinta iyo dhexdhexaadinta]**

**(a) [Samaynta; magacaabida maamulka]** Waxaa jirta hay'ad madax banaan oo loo yaqaano hay'ada dawlada dhexe uga qaabilsan heshiisiinta iyo dhexdhexaadinta ( taas oo halkan loogu yeedhay "hagaajin," laakiin lixdan maalmood kadib bishii June 23, 1947, erayga noocan ah waa in loogu yeedho hay'ada hawlaha heshiisiinta ee wasaarada shaqaalaha). Hay'adani waa inay hoostagto gudoomiyaha hay'ada dawlada dhexe ugu qaabilsan dhexdhexaadinta iyo heshiisiinta (kaasoo wixii halkan ka dambeeya loogu yeedhayo ("gudoomiye"), kaas oo ay tahay inuu madaxwaynuhu magacaabo isagoo la tashanaya golaha baarlamaanka ogolaanshahoodana waydiisanaya.Gudoomiyaha waxaa laga rabaa inaanu shaqo kale,ama ganacsi kale faraha lagelin oo uu ku koobnaado shaqada gudoomiye nimada keliya.

**(b) [Magacaabista saraakiisha iyo shaqaalaha ; bixinta lacagta alaabta xafiisyada ,kirada xafiisyada iyo adeegyada kale ]** sharciga madaniga ahi wuxuu awood u siinayaa gudoomiyaha inuu magacaabi karo karaaniyada noocan ah iyo shaqaalaha kale ee loo baahanyahay si ay u fuliyaan shaqooyinka loo baahanyahay iyo inuu go'aamiyo mushaharka shaqaalaha isagoo raacaya sharciga qaybta5101 ilaa 5115 iyo qaybaha 5331 ilaa 5338 ee ciwaankan5, ee sharciga maraykanka [cutubka 51 iyo cutub hoosaadka III ee cutubka 53 ee ciwaankan 5], waxaa kale oo laga yaabaa in isagoo gudoomiyuhu aan tixgelinayn qodobka sharciga madaniga ah inuu magacaabo dad ka shaqeeya heshiisiinta iyo dhexdhexaadinta marka ay lagama maarmaan u noqdaan socod siinta shaqada hay'ada . Gudoomiyuhu waxaa kale oo uu awood u leeyahay inuu bixiyo kharashyada ku baxa alaabta xafiisyada ,kirada iyo adeegyada kale marka uu u arko inay lagama maarmaan yihiin. Kharashyadan waa in la bixiyo marka ugu horaysa ee la keeno risiidada kadibna uu saxiixo gudoomiyuhu ama qof shaqaale ah oo gudoomiyuhu u xilsaaray inuu hawshaas qabto.

**SHARCIGA MAAMULKA XIRIIRKA GUUD EE SHAQAALAHA**

**(c) [ Xafiiska wayn iyo xafiis goboleedyada; awood bixinta gudoomiyaha iyo warbixinta sanadlaha ah ee la siiyo baarlamaanka ]** Xafiiska wayn ee hay'adu waa inuu ku yaalo degmada Columbia, dhexdeeda, laakiin waxaa laga yaabaa in gudoomiyuhu uu ka sameeyo xafiis goboleedyo meelaha laga yaabo in khilaaf shaqaale iyo loo shaqeeye uu ka kaco. Waxaa

kale oo laga yaabaa in gudoomiyuhu bixiyo amar uu ku joojinayo arin markasta oo uu rabo, iyo inuu isagoo ka fiirsanaya awoodiisa qayb ka mid ah wareejiyo taas oo ah arin uu sharcigani u ogolyahay [cutub] isagoo ku wareejinaya mid ka mid ah gudoomiyeyaasha gobolada oo uu isagu rabo,ama sarkaal ama qof shaqaale ah oo hay'ada u shaqeeya . Gudoomiyuhu waxaa kale uu samayn karaa nidaamyo ku haboon wada shaqaynta gobolada iyo hay'adaha dhex dhexaadinta ee degaanka. Waxaa kale oo gudoomiyaha laga rabaa inuu sanad kasta dhamaad kiisa warbixin qoraal ah siiiyo baarlamaanka

**(d) [Ku wareejinta dhamaan hawlaha heshiisiinta iyo dhexdhexaadinta hay'ada dawlada dhexe ugu qaabilsan heshiisiinta iyo dhexdhexaadinta ;maalinta uu hirgelayo lug kuma yeelanayso kiisaska dib loo dhigay]** dhamaan hay'adaha heshiisiinta iyo dhexdhexaadinta ee wasaarada shaqaalaha ama hay'ada heshiisiinta ee dawlada dhexe ee maraykanka ee hoos yimaada sharciga qaybtiisa51 [laga noqday] ee ciwaanka 29, ee sharciga maraykanka [ee ciwaanka], iyo dhamaan hay'adaha ka shaqeeya dib u heshiisiinta ee dalka maraykanka sharciga kasta ha hoos yimaadaane waxaa lagu wareejiyay iyaga iyo shaqaalahooda iyo qoraaladoodaba, hay'ada dawlada dhexe ee maraykanka u qaabilsan dhexdhexaadinta iyo dib u heshiisiinta wareejinta noocan ahi waxa ay hirgelaysaa lixdan maalmood kadib June 23, 1947. waxaa kale oo jirta wareejinta noocan ahi ma khusayso kiisaska dib loo dhigay ee horyaala hay'ada dhexdhexaadinta ee dalka maraykanka ama sharciyayn ay samaysay, ama amar,xukun,iyo sharciyayn uu bixiyey wisiirka shaqaaluhu. Gudoomiyaha iyo hay'ada heshiisiinta ee dawlada dhexe maaha in sinaba ay u hoostagan maamulka wisiirka shaqaalaha ama sarkaal kasta ama qayb kasta oo ka mid ah qaybaha wasaarada shaqada.

SHAQOOYINKA HAY,ADA DAWLADA DHEXE U QAABILSAN DHEXDHEXAADINTA

**Qaybta. 203. [§ 173. Shaqooyinka hay'ada dawlada dhexe ugu qaabilsan heshiisiinta iyo dhexdhexaadinta] (a) [ Xalinta khilaafyada iyadoo adeegsanaysa heshiisiin iyo dhexdhexaadin]** waa inay noqoto shaqada hay'ada heshiisiinta iyo dhexdhexaadintu sidii ay uga hortegi lahayd ama u yarayn lahayd khalkhal ku yimaada habsami u socodka hawlaha ganacsiga khal khal kaas oo ka kaca khilaaf ka dhexdhaca loo shaqeeyaha iyo shaqaalaha,sidaa darteed in hay'adu caawiso sidii ay labada dhinac u heshiin la haayeen iyagoo isticmaalaya habka dhexdhexaadinta

**(b) [Inay hay'adu iskeed u farageliso khilaafyada ama ay ku farageliso codsi ka yimaada dhinacyada is haya ,iyo iska daynta faragelinta khilaafyada yaryar]** waxaa laga yaabaa in hay'adu gacan u fidiso khilaaf kasta oo ka dhextaagan shaqaale iyo loo shaqeeye noocuu doono oo ganacsi ah hala xidhiidhee mar hadii khilaafkani wax u dhimayo habsami u socodka hawlaha ganacsiga,ama iskeed hay'adu ha u farageliso ama labada dhinac ee is haya mid ka mid ahi ha codsadee markasta oo hay'adu u aragto in khilaafkani khatar wayn ku yahay habsami u socodka ganacsiga. Waxaa kale oo hay'ada iyo gudoomiyeheeda lagu amray inayna isku deyin inay dhexdhexaadiyaan khilaafyada aan dhib badan u gaysanayn maslaxada ganacsiga,hadii gobolka iyo hay'adaha kale ee dhexdhexaadintu ay diyaar u yihiin dhexdhexaadinta labada dhinac. Markasta oo hay'adda dawlada dhexe ee heshiisiinta iyo dhexdhexaadintu ay faraha la gasho khilaaf taagan,waxaa waajib ku ah inay si degdeg ah ula xidhiidho dhinacyada is haya adeegsatana xirfadeeda ah dhexdhexaadinta iyo heshiisiinta si natiijo fiican oo heshiis ah loo gaadho.

**(c) [Raadinta xal madax banaan oo lagu xalinayo khilaafyada marka lagu guuldaraysto dhexdhexaadinta]** hadii gudoomiyuhu ku guul daraysto inuu habka dhexdhexaadinta ku heshiisiiyo labada dhinac wakhti macquul ah gudihii, waa inuu ku dhiiri geliyo labada dhinac inay iskood u raadiyaan xal kale oo ay ku xalinayaan khilaaf kooda iyagoon adeegsanayn shaqo joojin,albaabo xidhid iyo waxyaalaha kale ee la midka ah. Siyaalaha kale ee ay samayn karaan waxaa ka mid ah in shaqaaluhu cod qarsoodi ah u qaado wixii u dambeeyay ee loo shaqeeyuhu ogolaaday kadibna ay diidaan ama yeelaan shaqaaluhu. Hadii labada dhinac ama dhinac ka mid ahi diido fikradaha gudoomiyaha ee arintan ku saabsan looma qaadan karo inay tahay jebin la jebiyay sharcigan. [cutubka].

**(d) [Inay noqoto waxa ugu dambeeya ee la adeegsado heshiisiinta iyo dhexdhexaadinta]** waxka badalida u dambaysa ee lagu samaynayo arin labada dhinac ku heshiiyeen laguna dhawaaqay inay tahay sida ugu wanaagsan ee lagu xalin karo khilaafaadka ka bilowda fulinta ama fasiraada heshiis la gaadhay oo lagu gaadhay gorgortan . Hay’ada waxaa lagu amray inay adeegyadeeda heshiisiinta iyo dhexdhexaadinta ka dhigto kuwo diyaar u ah xalinta cabashooyinka iyo khilaafyada noocan ah iyadoo gelida arinta noocan ah ee hay’adu ay tahay xalka ugu dambeeya ee la adeegsanayo .

**(e) [Dhiirigelinta iyo taageerida dhismaha wax wada qabsi dhexmara shaqaalaha iyo maamulka kaas oo ay samaynayaan gudigu]** Waxaa awood loo siiyaya laguna amray in hay’adu dhiirigeliso,taageertana dhismaha gudi wada shaqayn ah oo ay wadajir u samaystaan maamulka loo shaqeeyaha iyo shaqaaluhu isu tagaas oo ay warshadu diyaarinayso ama gudiga guud ee warshadaha ee loogu talagalay xidhiidhka shaqaalaha iyo maamulka ,ilaalinta shaqada iyo sidii uu urur ahaan shaqo wanaagsan u qaban lahaa iyadoo la raacayo sharciga qaybtiisa 205A [qaybta 175a ee ciwaankan].

[la daabacay. L. 95–524, § 6(c)(1), Oct. 27, 1978, 92 Stat. 2020, lagu daray qayb hoosaadka. (e).]

**qaybta. 204. [§ 174. Waajibaadka isku midka ah ee saaran,shaqaalaha,wakiiladooda iyo maamulka si loo yareeyo khilaafyada shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha]** (a) Si looga hortago ama loo xadido hakad gala habsami u socodka hawlaha ganacsiga kaas oo ka kaca khilaaf dhexmara shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha ama wakiilada shaqaalaha iyo warshad kasta oo xidhiidh la leh hawlaha ganacsiga.

(1) waa in la adeegsado arin kasta oo macquul ah oo lagu samaynayo heshiis waara oo laga gaadhayo arimaha ay ka midka yihiin ,mushaharka,saacadaha shaqada iyo xaaladaha kale ee la xidhiidha shaqada ,iyadoo heshiiskaa lagu darayo qodob odhanaya markasta oo la rabo in wax laga badalo wax yaalaha lagu heshiiyey waa in la bixiyo ogaysiis wakhti ku filana la siinayo qolado ogaysiiska loo dirayo.

(2) markasta oo khilaaf ka dhasho xaalada waxyaalaha lagu heshiiyey iyo hirgelintooda heshiis kaas oo ahaa mid lagu gaadhay gorgortan dhexmaray labada dhinac, kadibna dhinac ka mid ah labada dhinac codsado in shir la isagu yimaado waa in si degdeg ah loo abaabulo in shir noocaas ah la isugu yimaado iyadoo laysku deyayo in shirkan lagu xaliyo khilaafkan sida ugu dhakhsaha badan.

(3) Hadaba hadii ay dhacdo in shirku xalin kari waayo khilaafkan waxaa laga rabaa hay’ada dhexdhexaadinta iyo heshiisinta ee dawlada dhexe inay si buuxda oo degdeg ah u qabato shirar badan oo lagu xalinayo khilaafkan iyagoo sharcigan raacaya.[cutubka] isla markaana ujeedadoodu tahay inay gacan ka gaystaan sidii khilaafkan loo xalin lahaa.

**Qaybta. 205. [§175. Gudiga Maamulka Heer qaran ee Shaqaalaha, samayntiisa iyo qaybaha a uu ka koobnaanayo, magacaabistiisa, mudada uu jirayo, mushaharka iyo shaqooyinka gudiga ]**

**SHARCIGA MAAMULKA XIRIIRKA GUUD EE SHAQAALAHA**

Waxaa jira gudi la sameeyey oo ay leeyihiin maamulka heer qaran ee shaqaaluhu kaas oo larabo inuu ka koobnaado laba iyo toban xubnood oo uu magacaabay madaxwaynuhu. Kuwaas oo ,lix kamid ah laga soo dhexdooranayo dadka ku caan baxay maamul wanaaga ,lixda kalana waxaa laga soo dhexdoorayaa dadka ku soo caan baxay hawlaha shaqaalaha. Xubin kasta oo gudigan ka mid ah waxa uu xafiisku haynayaa mudo sedex sano ah,marka laga reebo qof loo magacaabay inuu buuxiyo jago uu baneeyey xubin aan whakhtigiisii dhamaysan kadibna isku darsaday wakhtigii isaga loogu talagalay iyo wakhigii u harsanaa qofkii ka horeeyay ee jagada baneeyey. Waxaa kale oo larabaa in wakhtiga xubnuha ay xafiiska haynayaan uu ku ekaado wakhtigii madaxwaynuhu u xadeeyay markii uu xubnaha magacaabayay,waxaana sanadaha loo tirinayaa sidan dhamaadka sanadka koowaad,dhamaadka sanadka labaad iyo dhamaadka sanadka sedexaad iyadoo tirada laga bilaabayo maalinta ka dambaysa maalinta la magacaabay xubnaha.marka ay xubnaha gudigu ka shaqaynayaan shaqo uu gudigu leeyahay waxaa la siinaya mushahar ah $25, maalin kasta,waxaa kale oo ay xaq u leeyihiin in la siiyo lacag kale oo guno ama habeen dhax ah oo ay u isticmaalaan waxyaalaha ay u baahanyihiin marka ay safarada ku jiraan ee ay tagaan meel guryahooda ka fog.

(b)waxaa gudiga waajib ku ah marka uu gudoomiyuhu ka codsado, inay gudiga ka shaqeeyaan sidii loo joojin lahaa khilaaf dhexmara shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha iyagoo isticmaalaya habab ay kamid yihiin dhexdhexaadin iyo xalal kale ooy labada dhinac iskood u gaadhaan,iyagoo si gooni ah culayska u saaraya khilaafyada taabanaya danta guud ee dalka.

**qaybta. 205A. [§ 175a. Caawinta gudiga wadajirka ah ee warshada,degaanka,iyo dhamaan warshadaha iyo shaqaalaha]**

**(a) [Dismaha iyo shaqada gudiga guud ee wadajirka ah ee warshadaha, deegaanka iyo shaqaalaha]** (1) hay'ada dhexdhexaadinta iyo heshiisiintu waxa awood loo siiyay loona jiheeyey inay caawimo u fidiso dhismaha iyo hawl galka gudiga wadajirka ah ee maamulka loo shaqeeyaha iyo shaqaalaha ee heer warshadeed,heer degaan ama heer wadan

(A)Kaasoo si wadajir ah ay u dhiseen loo shaqeeyaha iyo ururada shaqaalaha ee matalaya shaqaalaha ka shaqaynaya warshad gooni ah,degaan gooni ah ama dhamaan warshadaha

(B) Sababta loo dhisayna tahay sidii loo wanaajin lahaa xidhiidhka u dhaxeeya maamulka loo shaqeeyaha iyo ka shaqaalaha,sidii loo hubin lahaa in qof waliba shaqadiisa haysto, ka shaqaynta kobcinta dhaqaalaha,sidii gudigu u noqon lahaa mid shaqadiisa qabsada iyo in shaqaalaha laga qaybgeliyo go'aamada taabanaya shaqadooda kaas oo ay ka mid yihiin wanaajinta xidhiidhka isku xidhnaanshaha ah ee shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha kaas oo la xidhiidha arimaha labada dhinacba danta u ah.

(2) hay'ada dhexdhexaadinta iyo heshiisiintu waxa awood loo siiyay loona jiheeyey inay qandaraas la gasho caawimo lacageedna siiso meel kasta oo ku haboon loogana baahanyahay iyadoo hay'adu fulinaysa waajibaadka sharciga qaybtani dusha ka saarayo.

**(b) [Xadidaada lacagta caawimaada ah,qandaraasyada, ama caawimaadaha kale ]** (1) iyadoo la raacayo sida sharcigan qabo,waxaa laga yaabaa inaan caawimo lacageed la siin,qandaraasna aan lala saxiixin,caawimo kalana aanan la siin warshad ama gudiga maamulka wadajirka ah ee shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha, hadii ayna shaqaalaha warshada ka shaqeeyaa aanay xubno ka ahayn urur shaqaale kaas oo wakiil ka ah shaqaalaha isla markaana uu jiro

(2) Iyadoo la raacayo sida sharcigan qabo, waxaa laga yaabaa inaan caawimo lacageed la siin, qandaraasna aan lala saxiixin, caawimo kalana aanan loo fidin degaan ama gudiga maamulka wadajirka ah ee shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha kaas oo matalaya warshado badan

Hadii ayna xubnahooda ka mid ahayn urur shaqaale loo sharciyeeyey ama loo aqoonsaday inuu wakiil ka yahay shaqaalaha u shaqeeya loo shaqeeyaha xubnaha ka ah gudiga. Majirto qayb sharcigan ka mid ah oo mamnuucaysa ka qayb qaadashada uu degaan ama gudiga maamulka wadajirka ah ee matalaya warshado badan inay xubno ka noqdaan, loo shaqeeye aanay shaqaalihiisu xubin ka ahayn urur shaqaale.
(3) iyadoo la raacayo sida sharcigan qabo,waxaa laga yaabaa inaan caawimo lacageed la siin,gudi kasta oo ah gudiga maamulka wadajirka ah ee shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha, kaas oo hay'ada dhexdhexaadinta iyo heshiisiinta ee dawlada dhexe ay ogaatay in ujeedoooyinkeeda ay ka mid tahay in shaqaalaha laga niyad jebiyo inay adeegsadaan xuquuqda uu siinayo sharciga qaybtiisa 7 ee sharciga xiriirka guud ee shaqaalaha (29 U.S.C. § 157) [qaybta 157 ee ciwaankan], ama lagu helay inay faragelisay gorgortan ka dhex socday warshad iyo shaqaalaheeda ama meelkasta oo laga shaqeeyo.

**(c) [Dhisida xafiiska ]** hay'ada dhexdhexaadinta iyo heshiisiinta ee dawlada dhexe waa inay raacdo sharciga qaybtiisan marka ay xafiis dhisayso.

**(d) [Ansixinta kharashyada]** Waxaa loo ansixiyey si sharciga qaybtan loo meel mariyo lacag dhan $10,000,000 miisaaniyada sanadka 1979, waxaana laga yaabaa in lacagtan oo kale loo baahdo hada kadib.

[waxaa la daabacay. L. 95–524, § 6(c)(2), Oct. 27, 1978, 92 Stat. 2020, waxaa lagu daray qaybta. 205

XAALADAHA DEGDEGA AH EE HEER QARAN

**Qaybta. 206. [§ 176. Magacaabida uu madaxwaynuhu magacaabayo gudi sare oo baadhitaan,warbiximaha iyo waxyaalaha ay xambaarsantahay iyo ka diiwaan gelinta hay'ada dhexdhexaadinta iyo heshiisiinta]** Markasta oo madaxwaynaha dawlada maraykanku u arko inay soo socoto khatar ah in shaqo joojini dhacdo ama shaqo joojin dhab ahi dhacdo ama irida u xidhid ku dhacayso shirkad wayn ama qayb ka mid ah shirkadaas, shirkadaas oo ku lug leh hawlaha ay ka midka yihiin ganacsiga noocyadiisa kala duwan,gaadiidka, warbaahinta ama isgaadhsiinta ka dhaxaysa dhawr gobol ama ku xidha wadamada dibada,ama wax soo saar la xidhiidha gacasiga taas oo hadii la ogolaado inay dhacdo ama mudo socoto dhibaato u gaysanaysa caafimaadka dad waynaha ama nabad geliyada wadanka waxaa laga yaabaa in madaxwaynuhu magacaabo gudi sameeya baadhitaan uu ku baadhayo waxyaalaha khilaafku ka taaganyahay kadibna warbixin qoraal ah u soo gudbiya madaxwaynaha iyagoo ku soo gudbinaya warbixintaas mudadii loo qabtay. Warbixinta noocan ah waa inay ku jirtaa jumlad run ah oo ku saabsan khilaafka laguna daro warbixin laga qaadayo labada dhinac ee is khilaafsan dhinac walbana ku sheego mawqifkiisa laakiin waa inaan lagu darin warbixinta wax talo bixin ah oo ka timaada gudiga baadhitaanka. Intaa kadib waa inuu madaxwaynuhu u gudbiyo nuqulka warbixintan hay'ada dawlada ugu qaabilsan dhexdhexaadinta iyo heshiisiinta iyo inuu madaxwaynuhu qoraalka warbixinta u bandhigo dad waynaha .

**qaybta. 207. [§ 177. Gudiga sare ee baadhitaanada]**

**(a) [Qaybaha gudiga]** Gudiga sare ee baadhitaanku waa inuu ka koobanyahay gudoomiye iyo xubno kale kuwaas oo madaxwaynuhu go'aaminayo kuwa ay noqonayaan,waxaa kale oo gudiga laga rabaa inuu leeyahay awood uu kaga shaqayn karo meel kasta oo dalka maraykan ka ah iyo inuu dacwooyinka ku dhegaysan karo meel dadwaynaha u furan ama meel gudiga u gooni ah

iyadoo la eegayo hadba sida ku haboon isla markaana la tixgelinayo waxa ay yihiin waxyaalaha la isku hayo ee khilaafku ka taagan yahay.
**(b) [mushaharka]** Xubnaha gudiga sare ee baadhitaanadu waa inay helaan mushahar ah $50 maalin kasta oo ay qabanayaan shaqo gudigu leeyahay iyadoo loogu darayo kharashyada ay u baahan yihiin marka ay safrayaan.

**SHARCIGA MAAMULKA XIRIIRKA GUUD EE SHAQAALAHA**

(c) [**Awoodaha wax lagu ogaado**] iyadoo ujeedadu tahay dhegaysi dacwadeed ama baadhitaan uu sameeyay gudi sare oo kasta oo lagu magacaabay shariga qaybtan qodobada lambar koodu yahay 49 iyo 50 ee ciwaanka 15, ee sharciga maraykanka [qaybaha 49 iyo 50 ee ciwaanka 15] (kaas oo la xidhiidha markhaatiyada goob jooga ah iyo soo saarida buugta,qoraalada iyo warqadaha aqoonsiga) ayaa waxaa la sameeyey iyadoo lala xidhiidhinayo awoodaha iyo shaqooyinka gudiga sare ee noocan ah.

**Qaybta. 208. [§ 178. Sharciyada degdega ah ee la soo rogo marka wadanku xaalad degdeg ah ku jiro]**

**(a) [Codsi ama rafcaan uu xeer ilaaliyaha guud u dirayo maxkamada madaniga ah isagoo raacaya amarka madaxwaynaha]** marka ugu horaysa ee madaxwaynuhu helo warbixinta gudiga baadhitaanada waxaa laga yabaa inuu madaxwaynuhu ku amro xeer ilaaliyaha guud inuu codsi rafcaan ah u diro maxkamadaha dawlada dhexe ee ay awoodooda hoos yimaadaan labada dhinac ee is haya kuwaas oo laga yaabo inay sababaan shaqo joojin ama sababay shaqo joojinta ama rabshadaha kale isla markaa hadii ay maxkamadu aragto inay jirto khatar ah in shaqo joojin dhacdo ama ay shaqo joojintu dhacdayba
(i) taas oo laga yaabo inay saamayso dhamaan ganacsiga iyo wax soo saarka ama qayb wayn oo ka mid ah shirkadaha ku shaqo leh ganacsiga wax is dhaafsiga ah, ama ganacsiga guud ahaan gaadiidka, warbaahinta ama isgaadhsiinta kuwaas oo isku xidha dhawr gobol iyo wadamada dibada
(ii) kaas oo hadii la ogolaado inay dhacdo, ama sii socoto marka ay dhacdo khatar gelinaysa caafimaadka dad waynaha ama nabad gelyada wadanka waa in maxkamadu leedahay awood sharci ah oo ay ku joojin karto shaqo joojinta noocan ah inay dhacdo ama ay ku amri karto soo afjarida shaqo joojin socotay ama ay ku bixin karto amaro kale oo arinta ku haboon.

**(b) [Sida aanay suurta gal u ahayn in la adeegsado sharciga cutubka 6aad]** Wax kasta oo dhaca sharciga qaybihiisa kala ah 101 ilaa 115 ee ciwaanka 29, ee sharciga maraykanka [ciwaanka cutubka 6aad] [ee loo yaqaano “sharciga, Norris-LaGuardia”] maaha inuu qabto ama loo adeegsodo.

**(c) [Dib u eegida sharciyada]** Amarka ama amarada maxkamada waa inay dib u eegto maxkamad ku haboon dib u eegida amarada taas oo ah maxkamada rafcaanada ee dawlada dhexe ee maraykanku iyo maxkamada u saraysa wadanka iyagoo adeeg sanaya amar qoraal oo kasoo baxay maxkamada sare ama sharciyada kale ee lagu cadeeyay sharciga qaybtiisa 1254 ee ciwaanka 28, ee sharciga maraykanka [qaybta 1254 ee ciwaanka28].

**Qaybta. 209. [§ 179. Sharciyada degdega ah ee la soo rogo marka wadanku xaalad degdeg ah ku jiro; iyo dadaal sidii ay labada dhinac ula qabsan lahaayeen isbadalka mudada xaalada degdega ah lagu jiro]**

**(a) [Caawimaadaha hay’ada dhexdhexaadinta; iyo ogolaanshaha dhexdhexaadinta ay soo jeedisay hay’ada dhexdhexaadinta iyo heshiisiintu]** wakhti kasta oo maxkamada degmadu ay amar bixiso iyadoo adeegsanaysa sharciga qaybtiisa ah 208 [qaybta 178 ee ciwaankan] amarkaas oo ah mid lagu joojinayo fal wax u dhimaya ama khatar gelinaya caafimaadka dad waynaha ama nabad gelyada wadanka ,waa waajib saaran labada dhinac ee khilaafka shaqaalaha iyo loo

shaqeeyuhu ka dhaxeeyo iyagoo raacaya amarka maxkamada inay sameeyaan wax kasta oo awoodooda ah oo ay ku xalinayaan khilaafka u dhexeeya iyagoo adeegsanaya caawimaadaha hay'ad heshiisiinta iyo dhexdhexaadinta ee sharcigani u ogol yahay [cutubka]. Maaha waajib sharci ah oo saaran labada dhinac ee is khilaafsan ama dhinac ka mid ahi inuu aqbalo dhamaan ama qayb ka mid ah fikradaha dhexdhexaadinta ah eey soo jeedisay hay ada heshiisiinta iyo dhexdhexaadintu.

**(b) [Kulanka gudiga sare ee baadhitaanada; warbixinta gudiga sare iyo waxa ay xanbaarsan tahay, cod bixinta qarsoon ee shaqaalaha ee ay qabanayaan gudiga sare ee xidhiidhka guud ee shaqaalaha iyo sharciyaynta natiijada ee xeer ilaaliyaha guud]** Marka u horaysa ee amar noocan oo kale ah la bixiyo,madaxwaynuhu waa inuu shir isugu yeedho gudiga baadhitaanada kuwaas oo markii hore u soo gudbiyey warbixin ay ka soo diyaariyeen khilaafka.kadibna marka ay mudo lixdan maalmood ahi kasoo wareegto ( hadii aan khilaafka lagu xalin mudadaa dhexdeeda), gudiga baadhitaanadu waa inay madaxwaynaha u soo gudbiyaan warbixin ku saabsan mowqifyada ay labada dhinac iyo dadaalada la sameeyay sidii khilaafka loo xalin lahaa. Waxaa kale oo la rabaa in warbixinta lagu daro warbixin laga qaadayo labada dhinac oo dhan kastaa ku cadaynayo mowqifkiisa uu arinta ka taagan yahay iyo wixii u dambeeyay ee loo shaqeeyuhu u ogolaaday shaqaalaha si arinta xal looga gaadho.

Isla markaa madaxwaynuhu waa inuu warbixinta u bandhigo dadwaynaha . kadibna gudiga xidhiidhka guud ee ururada shaqaaluhu, waa inay shan iyo toban maalmood gudaheed ku qaadaan codbixin qarsoodi ah oo ay ka qayb qaadanayaan dhamaan shaqaalaha loo shaqeeye kasta oo lug ku leh khilaafka codbixinta loo qaadayo . Isla markaana iyagoo shaqaaluhu u codaynaya inay ogolaadaan iyo inkale wixii u dambeeya ee shaqaale kasta loo shaqeeyahiisu u ogolaaday iyagoo sideeda ku qaadanaya.Hadii ay ogolaadaan shaqaaluhu arintan waa in xeer ilaaliyaha guud uu shan maalmood gudahood ku sharciyeeyo heshiiskan.

**Qaybta. 210. [§ 180. Ka qaadida xukunka degdega ah marka u horaysa ee la sharciyeeyo natiijada cod bixinta shaqaalaha ama heshiiska lagu heshiiyey loo gudbiyo baarlamaanka]** marka ugu horaysa, ee la sharciyeeyo natiijada cod bixinta shaqaalaha, ama heshiis laga gaadho arinta khilaafku ka taagnaa labadooda kii soo hormaraba ,xeer ilaaliyaha guud waa inuu ku amro inay maxkamadu qaado xukunka degdeg ah,arintaas oo kadibna cod loo qaadayo xukunkana degdega ahna lagu qaadayo. Kadib marka xukunka degdega laqaado ,waa in madaxwaynuhu u gudbiyo baarlamaanka warbixin buuxda oo ku saabsan sida ay hawshu u dhacday oo ay ku jiraan waxyaalihii ay gudiga baadhitaanadu ku ogaadeen baadhitaan koodii iyo codkii qarsoodiga ahaa ee uu qaaday xiriirka guud ee ururada shaqaaluhu. Isagoo intaa raacinaya waxyaalaha uu u arko inay heshiiska ka dhigayaan mid waara iyo talaabooyinka kale ee arinta ku haboon.

DHAMAYSTIRKA HESHIISYADA LAGU GAADHO GORGORTANKA LOO DHANYAHAY ,IWM.

**Qaybta. 211. [§ 181.]** (a) Tusaale yaasha,talooyinka iyo warbixinta ay danaynayaan wakiilada loo shaqeeyaha,shaqaalaha, yo guud ahaan dad waynuhu,waa in waaxda u qaabilsan wasaarada shaqada iyo shaqaalaha arimaha sahamintu ay hayaan diiwaan nuqulo ah oo ay ku dhanyihiin dhamaan wada xaajoodyadii gorgortanka ahaa iyo heshiisyadii lagu gaadhay iyo heshiis kasta oo lagu xaliyay khilaaf ka dhex taagna shaqaale iyo loo shaqeeye. Diiwaanka noocan ah waa in loo furo in baadhitaano lagu sameeyo,iyadoo la raacayo sharciga uu u dejiyay wasiirka wasaarada shaqada iyo shaqaaluhu,marka laga reebo warbiximaha sida qarsoodiga ah loogu dhiibay ee aan la ogolayn in cid kale aragto.

(b) Xafiiska Tiro koobka ee waaxda shaqaalaha waxa lo oglolaaday inuu soo soo bandhigo haddii ay ka codsadaan adeegyada, ama loo shaqeeyaha, ama shaqaalaha, ama wakiiladooda, dhamaan macluumaadka la heli karo iyo waxyaabaha xaqiiqada ah ee gargaar u noqon kara in laga gaaro heshiis khilaaf soo gala dhex galay, marka laga reebo maclumaadka si gaar ah loo codsadsay in laga dhigo qarsoodi.

WAXYAALAHA LAGA REEBAY SHARCIGA SHAQAALAHA WADOOYINKA TAREENADA

**Qaybta. 212. [§ 182.]** The ciwaanka qaybtani [cutub hoosaad] maaha inuu noqdo mid sinaba u khuseeya arin ku saabsan sharciga shaqaalaha wadooyinka tareenada [45 U.S.C. § 151 et seq.], kaas oo ah mid wax laga badalay mudo kadib.

DHEXDHEXAADINTA KHILAAFYADA U DHEXEEYA SHAQAALAHA CAAFIMAADKA IYO MEELAHA AY KA SHAQEEYAAN

**Qaybta. 213. [§ 183.] (a) [Dhisida iyo xubin ka noqoshada gudi sare oo baadhitaanada u qaabilsan]** Hadii uu gudoomiyaha hay'ada dawlada dhexe u qaabilsan dhexdhexaadinta iyo heshiisiintu u arko

**SHARCIGA MAAMULKA XIRIIRKA GUUD EE SHAQAALAHA**

Inay soo socoto khatar shaqo joojin ahi ama ay shaqo joojini dhacdo taas oo saamaynaysa goobaha caafimaadka ku shaqada leh hadii la ogolaado inay shaqo joojintani dhacdo ama haday dhacday inay sii socotaa ay si wayn u hakinayso adeegyada caafimaadka ee deegaanada ay shaqo joojintu ka dhacday ,marka ay xaaladu sidan noqoto waxaa laga yaabaa inuu gudoomiyuhu taageero dheeraad ah siiyo hirgelinta sharciga is mariwaaga 30 maalmood kadib marka la ogaysiiyo hay'ada dawlada dhexe u qaabilsan dhexdhexaadinta iyo heshiisiinta sida ku cad shariga (A) ee jumlada u dambaysa ee qaybta 8(d) [qaybta 158(d) ee ciwaankan] (kaas oo u shuruud ka dhigayo sharciga qaybtiisa (3) ee qaybta noocan ah 8(d) [qaybta158(d) ee ciwaanka]), ama 10 maalmood gudahood kadib marka ogaysiiska la bixiyey sida sharcigani dhigayo (B),markaa waxaa la rabaa in gudi dhexdhexaad ahi baadhitaan ku sameeyo waxyaalaha laysku khilaaf sanyahay kadibna uu warbixin qoraal ah uu siiyo labada dhinac marka ay mudo shan iyo toban maalmood ahi kasoo wareegto maalintii gudigan la dhisay. Waa in warbixintan qoraalkaa ay ku jiraan waxyaalaha xaqiiqada ah ee gudigu baadhitaanka ku ogaaday iyo talooyinka gudigu uu bixinayo ee ku saabsan sidii khilaafkan loogu xalin lahaa si dedeg ah oo nabad gelyo iyo, cadaalad ah. gudiyada noocan ahi waa inay ka kooban yihiin tiro xubno ah oo uu gudoomiyuhu u arkay inay shaqadan ku haboon yihiin. Lama ogola in xubin ka mid ah xubnaha arintan loo magacaabay uu dankhaas ah ka leeyahay ama uu ku lug leeyahay hay'adaha caafimaadka ama urur shaqaalaha ay ku jiraan shaqaalaha khilaafku ka dhexeeyo loo shaqeeyaha

(**b) [Magdhawga ama musharka la siinayo xubnaha gudiga baadhitaanada]** (1) Xubnaha gudi kasta oo lagu dhisay sharcigan kuwaas oo shaqooyin kale u haya dawlada dhexe ,waa inay shaqadan qabtaan iyagoon wax magdhaw ah ama mushahar ah la siinayn ,laakiin la siinayo kharashyada ku baxa marka safaarada loo diro iyo kharashyada kale ee ku baxa marka ay shaqada gudanayaan iyagoo gudanaya waajibaadka sharcigani dusha ka saarayo.

(2) Xubnaha gudi kasta oo lagu dhisay sharcigan,kuwaas oo uuna qabanayn sharciga fakhradan (1) waa in la siiyo mushahar ama magdhaw uu qiimahiisa go'aaminayo gudoomiyuhu,laakiin waa inuuna ka badanin qiyaasta uu maalintii u xadiday sharciga lambarkiisu yahay GS–18 kaas oo ah jadwal samaynta guud ee sharcigan qaybtan 5332 ee ciwaanka 5, ee sharciga maraykanka [qaybta 5332 ee ciwaanka 5], marka lagu daro safarka ay galaan maalin walba iyagoo

shaqadooda gudanaya sharcigana raacaya,waxay xaq u leeyihiin in loo celiyo kharashyadii kaga baxay safarka oo ay ka mid yihiin gaadiid,iyo cuntada iyo kharashyada kale ee muhiimka ee ku baxa iyagoo shaqadooda gudanaya sharcigana raacaya.

**(c) [Heshiisyada hore loogu heshiiyey oon wax laga badalin]** Kadib marka la dhiso gudiga iyadoo la raacayo sharcigan qayb hoosaadkiisa (a) ee qaybtan , kadibna 15maalmood markay ka soo wareegto whakhtigii gudiga la dhisay gudigu waa inuu warbixintiisa gudbiyo, isla markaana majiro wax laga badalayo sharciyadii iyo waxyaalihii kale ee hore loogu heshiiyey ilaa laga gaadhayo wakhtigii qandaraasku ku ekaa ama laga gaadhayo wakhtiga laga wadaxaajoonayo cusboonaysiinta qandaraaska, ama hadii lasoo rogo sharciga ismariwaaga ah ee la soo rogo marka khilaafyada xalkoodu adkaado, heshiis yadii lagu gaadhay gorgortanka wadajirka ah ee ka horeeya sidoodii ayey u jirayaan ,marka laga reebo heshiis ay labada dhinac gaadheen iyagoon si wanaagsan isugu afgaran heshiiskaas.

**(d) [Ansixinta ama ogolaanshaha kharashyada ]** Waxaa la ansixiyay in la bixiyo lacago noocan ah oo ah hadba inta loo baahanyahay si loo dhaqan geliyo sharcigan**.**

**CIWAANKA III**

[Ciwaanka 29, ee cutubka 7, cutub hoosaadka IV, ee sharciga maraykanka]

DACWADAHA MAGDHAWGA LAGU WAYDIISANAYO URUR SHAQAALAHA AMA AY IYAGU MAGDHAWGA KU DOONAYAAN

**qaybta. 301. [§ 185.] (a) [Meesha arintu ka dhacaday, qiimaha khilaafku ka taagan yahay, iyo jinsiyada qofkaas ama dadkaas]** dacwadaha magdhawga lagu raadinayo ee ku saabsan xad gudub lagu xad gudbay qandaraas hore ay u kala saxiixdeen,loo shaqeeye iyo urur shaqaale wakiil ka ah shaqaalaha u shaqeeya ganacsi ama warshad saamayn ku yeelanaysa habsami u socodka hawlaha ganacsiga ee lagu cadeeyey sharcigan [cutubka], ama urur shaqaalahan oo kale inay dacwad ka furo maxkamad kasta oo heer degmo ah oo ku taala dalka maraykanka taas oo ay labada dhinac ee is hayaa ay awoodeeda sharci hoos yimaadaan,iyadoon maxkamadaasi eegayn inta uu dhanyahay qiimaha laysku hayaa isla markaana aan tix gelinayn jinsiyadaha labada dhinac ee is haya.

(**b) [Mas'uul ka noqoshada falka wakiilkaaga ; sugnaanta sababta magdhawga lagu rabo iyo meelmarinta marka dhinac lacag loo xukumo]** urur shaqaale kasta oo wakiil ka ah shaqaale ka shaqeeya warshad ama ganacsi saamayn ku yeelanaya habsami u socodka ganacsiga sida lagu qeexay sharcigan [cutubka] iyo loo shaqeeye kasta oo shaqadiisu ay saamayn ku yeela'uul ka noqdo falka wakiil kiisa. Urur shaqaale kasta oo noocan ahi wuxuu soo oogi karaa dacwad uu magdhaw ku doonayo waxaana lagu soo oogi karaa dacwad magdhaw lagaga rabo oo isagu yahay eedaysanaha,iyadoo qolada dacwada kusoo oogaysaa ay tahay shaqaalihii uu urur shaqaaluhu wakiilka uga ahaan jiray dacwadaha la hor keenay maxkamadaha dawlada maraykanka. Lacag kasta oo maxkamada dawlada maraykanku ku xukunto inuu urur shaqaale bixiyo waa inay tahay mid looga rabo inay ururnimo u bixiyaan iyagoo isticmaalaya lacagta ay ururnimo meel u dhigteen,laakiin maaha in lacagta laga qaado qof xubin ka ah urur shaqaalaha ama la farageliyo lacagtiisa khaaska u ah.

**(c) [Awooda sharciga ah]** iyadoo ujeedadu tahay talaabooyin laga qaadayo ama dacwado ay soo oogayaan urur shaqaale ama iyagu lagu soo oogayo kuwaas oo ka dhacaya maxkamadaha heer degmo ee dawlada dhexe ee maraykanka ,marka u horaysa maxkamada degmadu waa inay ka fikirto inay leedahay awood sharci oo ay ku dhegaysato dacwada urur shaqaalaha (1) ee ka dhacaysa degmada uu ku yaalo xafiiska wayn ee urur shaqaalahan ama (2) degma kasta oo ay ka shaqeeyaan saraakiil ay urur shaqaaluhu leeyihiin ama wakiilo iyaga matalaya kuwaas oo awood u haysta inay matalaan urur shaqaalaha ama xubno shaqaale ah oo wakiil ka ah urur shaqaalaha.

**(d) [Nidaamka shaqooyinka maxkamada]** Shaqooyinka la xidhiidha ,maxkamad uga yeedhida ama nidaamyada kale ee sharciga ah ee maxkamada kasta oo ku taala dalka maraykanku ka qaado sarkaal ama wakiil ka tirsan urur shaqaale, awoodiisu intay doonto ha gaadhee waxaa loo tixgelinayaan in talaabadaa laga qaaday urur shaqaalahaas.

**(e) [Go'aan ka gaadhida su'aasha ku saabsan in qof matali karo, qofkale]** Ujeedada sharciga qaybtiisan waxaa lagu go'aaminayaan in hadii qof matalayo qof kale, in qofka la matalayay uu mas'uul ka yahay iyo in kale falka ama ficilka qofka matalayay,isla markaana waa in su'aasha ku saabsan in qofka la matalayay uu ogolaaday falal khaas ah oo qofka wax matalaya uu sameeyay waa in ayna noqon mid la iswaydiiyo**.**

XADIDAADA LACAGAHA LA SIINAYO WAKIILADA SHAQAALAHA

**qaybta. 302. [§ 186.] (a) [ Lacagaha uu siinayo ama uu dayminayo loo shaqeeye ama hay'adi ,wakiilada shaqaalaha ama urur shaqaalaha]** waa sharci daro in loo shaqeeye ama urur ay loo shaqeeyayaashu leeyihiin ama qofkasta oo matalaya inuu yahay qof khibrad u leh sida loo wanaajiyo xidhiidhka shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha,ama lataliya u ah loo shaqeeyaha. ama ka shaqaynaya maslaxada loo shaqeeyuhu inuu lacag siiyo,ama daymiyo,ama uu ogolaado inuu u soo diro lacag dayn ama deeq ah ama shayo kale oo qiimo leh.

## SHARCIGA MAAMULKA XIRIIRKA GUUD EE SHAQAALAHA

(1) Wakiil kasta oo wakiil ka ah shaqaalihiisa, kuwaas oo ka shaqeeya warshad ama ganacsi saamayn ku leh hawlaha ganacsiga, ama

(2) Urur shaqaale kasta ama saraakiisha u shaqaysa urur shaqaalahaas, kuwaas oo wakiilo ka ah ama doonaya inay wakiilo noqdaan ama qirta inay xubno ka yihiin shaqaalaha ka shaqeeya loo shaqeeye saamayn ku yeelan kara habsami u socodka hawlaha ganacsiga.

(3)Qofkasta oo shaqaale ah ama koox shaqaale ah,ama gudi shaqaale oo u shaqeeya loo shaqeeye noocan ah oo ku yeelan kara saamayn ka badan inta caadiga ah ee awoodiisu gaadh siisantahay habsami u socodka hawlaha ganacsiga iyadoo ujeedada ka dambaysaa ay tahay inay sababaan in shaqaalahan ama kooxdan shaqaalaha ah ama gudigan shaqaalaha ay si toos ah ama si aan toos ahayn u farageliyaan xuquuqda uu sharcigu siinayo shaqaalaha kale oo ay ka midka yihiin xaqa ay u leeyihiin inay ururo samaystaan iyo inay si wadajir ah ula gorgortamaan loo shaqeeyaha iyagoo adeegsanaya wakiilo ay iyagu iskood u doorteen, ama

(4)Sarkaal kasta ama shaqaale kasta oo u shaqeeya urur shaqaale xidhiidh ka dhaxeeyo warshad ama ganacsi saamayn ku leh hawlaha ganacsiga, iyadoo muhimada uu ka leeyahay ay tahay inuu lug ku yeesho dhamaan hawlaha uu qabanayo ee la xidhiidha shaqadiisa ah wakiilka uu ka yahay shaqaale ama urur shaqaale ama saraakiil kale shaqooyin kaas oo ay ka mid yihiin talaabooyinka uu qaadayo, go'aamada uu gaadhayo isagoo gudanaya waajibaad kiisa wakiilnimo.

**(b) [Codsi, ama amar iwm, oo lagu waydiisanayo, lacag ama shayyo kale oo qiimo leh]**

(1) Waa sharci daro in qof codsado,amar ku bixiyo,qaato ama ogolaado ama kula heshiiyo inuu qaato ama loo soo diro lacag siin ah,ama dayn ah ama loo soo diro lacag ama alaab kale oo qiimo leh kuwaas oo sharci hoosaad kani mamnuucayo (a) [ee qaybtan].

(2)Waa arin sharci daro inay urur shaqaale ama qof kasta oo matalaya inuu sarkaal yahay,ama wakiil, ama shaqaale u shaqeeya urur shaqaalahan inuu amar ku bixiyo,ama ka ogolaado dadka ka shaqeeya gawaadhida ( sida lagu qeexay qaybta sharciga isu socodka ganacsiga [49 U.S.C. § 301 et seq.]) kuwaas oo loo shaqaaleyey inay ka shaqeeyaan gaadiidka qaadaya alaabta ganacsiga, ama loo shaqeeyayaasha kale ee shaqaaleeya shaqaalaha gaadiidka,majirto wax lacag ah ama alaabooyin kale oo qiimo leh oo la siinayo ururka noocan ah ama,saraakiisha,ama,wakiilada ama shaqaalaha iyadoo lacagtaa loo siinayo dejinta ay alaabta ka

dejiyeen gawaadhida ama arin la xidhiidha dejinta alaabta ay ka dejinayaan gawaadhida. waxaa kale oo halkan lagu cadeeyey inuuna jirin wax sharcigan ka mid ah oo loo fasiran karo inay sharci daro tahay in loo shaqeeyuhu siiyo shaqaalihiisa lacagta ay xaqa u leeyihiin ee ay shaqaysteen,.

**(c) [Waxyaalaha uuna sharcigani qabanin ]** Sharciga qaybtani ma khuseeyo,loomana adeegsankaro (1) Arin la xidhiidha lacag ama alaabo kale oo qiimo leh oo loo shaqeeye siiyey mid ka mid ah shaqaalihiisa kaas ooy shaqadiiisa ka mid tahay inuu sicad u matalo loo shaqeeyahan arimaha la xidhiidha, xidhiidhka ka dhexeeya shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha ama uu yahay qof shaqaalaha maamula ,ama wakiil kasta oo ay shaqaalihiisu leeyihiin,ama sarkaal kasta,ama shaqaale kasta oo xubno ka ah urur shaqaale kuwaas oo ah shaqaale u shaqeeya ama u shaqayn jiray loo shaqeeyahan iyadoo loo siinayo mushahar ahaan ama shaqo kale oo shaqadiisa la xidhiidha uu u qabtay loo shaqeeyaha. (2) Arinta ku saabsan lacag bixinta ,ama dirida lacagta ama alaabooyin kale oo qiimo leh marka lagu qanco xukun ay maxkamadi riday ama go’aan ay qaadatay,ama abaal gud la siiyo xaakim dhexdhexaad ah oo sameeyay heshiis meel dhexe laysugu imanayo,ama xal waara, ama heshiis waxka badalaya heshiis hore ,ama u fasaxay waxka xidhnaa ama xaliyey khilaafyo iyo cabashooyin taagnaa iyadoon wax musuq maasuq ah ama cadaalad daro ahi ayna ku jirin.

(3) Arinta ku saabsan iibinta iyo gadashada qoraalada ama alaabooyinka kale iyadoo lagu gadayo ama lagu gadanayo qiimaha uu suuqa ka joogo loona gadayo ama gadanayo sida caadiga ah ee ganacsiga loo sameeyo;(4) arinta kale ee ku saabsan lacagaha laga gooyo mushaharka shaqaalaha, kuwaas oo lagu bixinayo lacagta bilaha ah ee shaqaalaha laga qaado si ay xubno uga sii ahaadaan urur shaqaale : waxaa kale oo sharcigan lagu cadeeyay in loo shaqeeyaha laga rabo inuu qof walba oo shaqaale ah oo lacag laga gooyo inuu ka saxiixo heshiis qoraal ah kaas oon laga bixi karin wakhtiga uu jirayaana uu yahay mudo halsano ka badan ama ilaa laga gaadhayo dhamaadka heshiis lagu gaadhay gorgortan wadajir ah hadba kii soo hormara , (5) Arimaha kale ee ku saabsan lacagaha ama alaabooyinka kale ee qiimaha leh ee lagu bixiyo sanduuqa shaqaalaha kaas oo wakiiladu ugu tala galeen in lagu fuliyo keliya danaha shaqaalaha u shaqeeya loo shaqeeyahan iyo qoysaskooda iyo dadka kale ee ku tiirsan (ama shaqaale kale oo noocan ah iyo qoysaskooda iyo dadka ku tiirsan kuwaas oo u shaqeeya loo shaqeeye kale bixiyana qiimo la mid ah kan ay shaqaalahani bixiyaaan): waxaa kale oo sharcigan lagu cadeeyey, (A) Lacagaha noocan ah waxaa lagu haynayaa sanduuqa iyadoo ujeedada loogu haynayaa ay tahay in loo siiyo shaqaalaha mushahar ahaan ama faa,iido ahaan ama labadaba ,iyadoo lagu bixinayo maslaxada shaqaalaha,qoysaskooda ama dadka ku tiirsan,lagana bixinayo kharashyada ay ka midka yihiin caafimaadka,ama loo siinayo ,lacagta hawlgabka lasiiyo ,ama marka qof shaqaale ahi dhinto,ama magdhaw marka qof shaqaale ah dhaawac soo gaadho ama uu xanuunsado iyadoo xanuunku la xidhiidho shaqada uu qofka shaqaalaha ahi qabanayay ama lagaga bixiyo lacagaha caymiska ay hore ugu jireen,ama la siiyo marka qofka shaqada laga eryo ama ka dhamaato,ama lagaga bixiyo caymiska nafta ,ama caymis loogu talagalay markuu qofku curyaamo,ama xanuunsado,ama shil gaadhi ku dhaco. (B) Arinta ku saabsan sida lacagtan loo bixinayo waxaa si tafatiran loogu kala dhigdhigay heshiis qoraal ah oo dhexmaray shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha iyadoo loo shaqeeyuhu ku leeyahay gudiga sanduuqa wakiilo lamid ah kuwa shaqaaluhu leeyahay isla markaana si wada jir ayaa gudigaa dhexdhexaadka ah ee labada dhinacba ka socda ayaa hadii wax is khilaaf ahi dhexmaro shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha khilaafkaas oo ku saabsan maamulka sanduuqa,lana waayo gudi kale oo dhexdhexaad ah oo awood u leh inuu dhexdhexaadiyo arinta ,hadii xaaladu sidaa u dhacdo waxaa loo noqonayaa heshiiska labada dhinac u yaalay kaas oo dhigaya inay labada dhinac si wadajir ah u doortaan qof xaakim ah oo dhexdhexaad ah oo khilaaf

kooda xaliya ama hadii ay ku guul daraystaan inay khilaaf kooda ku xaliyaan mudo go'an oo macquul ah gudaheed, waa in xaakimka dhexdhexaadka ahi uu go'aamiyo in khilaafkan,iyadoo laraacayo codsiga labada dhinac ama midkood in khilaafkan loo diro maxkamad heer degmo ah oo ay leedahay dawlada maraykanku taas oo ku taala meesha sanduuqa xafiiskiisa wayni ku yaalo,waxaa kale oo larabaa inay maxkamada keenaan xisaab xidhkii sanadka ee sanduuqa,iyo natiijooyinkii kasoo baxay warbiximaha kale ee loo diyaariyey baadhitaanada ay samaynayaan dadka ka shaqeeya xafiiska wayn ee sanduuqa iyo meelaha kale ee heshiiska ku qoran (C) lacagaha noocan ah ee loogu talagalay in shaqaalaha la siiyo marka ay hawl gabka noqdaan waxaa loo sameeyaa sanduuq gooni ah oo lacagta la dhigo loo isticmaalayo keliya in lagu bixiyo mushaharka hawl gabka ama lacagta guna ahaanta loo siiyo ee sanad laha ah (6) Arinta ku saabsan lacagta ama waxyaalaha kale ee qiimaha leh uu loo shaqeeyuhu siinayo sanduuqa ay dhiseen wakiiladu sababta loo sameeyayna ay tahay in loo isticmaalo wakhtiga fasaxyada iidaha, ama lacagaha loo horumariyo marka shaqaalaha shaqo dhimid lagu sameeyo iyo waxyaalaha la midka ah ama in lagu bixiyo kharashyada waxbarashada ama tababarada kale : waxaa kale oo sharcigan lagu cadeeyay, in shuruudaha sharcigan ku qoran fakhradan (B) kaas oo ka horeeyay fakhradan (5) ee qayb hoosaadkan waa in lagu fuliyo.

## SHARCIGA MAAMULKA XIRIIRKA GUUD EE SHAQAALAHA

Arinta noocan ee sanduuqa; (7) Arinta ku saabsan lacagta ama waxyaalaha kale ee qiimaha leh ee loo shaqeeyuhu siinayo sanduuq dad badan ka dhexeeya ama mid qof keli ahi leeyahay kaas oo wakiiladu u dhiseen ujeedo ah (A) in deeq waxbarasho ahaan ay u isticmaalaan shaqaalaha, qoysaskooda,iyo dadka iyaga ku tiirsani si ay wax uga bartaan jaamacadaha iyo goobaha kale ee wax barashada (B) ama ay caruurtooda u geeyaan meelaha caruurta lagu hayo inta aanay da'da iskuulka gaadhin iyo caruurta da'da iskuulka gaadhay ee iyaga ku tiirsan ama (C) in shaqaalaha la siiyo caawimo dhaqaale oo ay kirada iskaga bixiyaan: waxaa kale oo sharcigan lagu cadeeyay in aan xaq loogu lahayn urur shaqaaleyaasha iyo loo shaqeeyayaasha in lagula gorgortamo inay sameeyaan sanduuq noocan oo kale ah,hadii ay diidaan looma fasiran karo inay tahay ku xadgudub xuquuq shaqaale, waxaa kale oo si dheeraad ah loogu cadeeyey, in shuruudaha sharciga fakhradan(B) iyo kuwa kale ee la xidhiidha fakhradan (5) ee qayb hoosaadkan waa in lagu fuliyo sanduuqa noocan ah;(8) Arinta ku saabsan lacagta ama waxyaalaha kale ee qiimaha leh ee uu loo shaqeeyuhu siinayo sanduuqa ay dhiseen wakiiladu sababta loo sameeyayna ay tahay in lagu bixiyo kharashka la xidhiidha sharciga ee shaqaalaha,qoysaskooda iyo dadka ku tiirsan iyagoo dooranaya cida garyaqaanka u noqonaysa ama loo doorayo. waxaa kale oo sharcigan lagu cadeeyay , in shuruudaha sharciga fakhradan (B) iyo kuwa kale ee la xidhiidha fakhradan (5) ee qayb hoosaadkan waa in lagu fuliyo sanduuqa noocan ah : waxaa kale oo si dheeraad ah loogu cadeeyay, in aan la ogolayn inaan adeegan sharciga ah loo isticmaalo (A) ama lagu bilaabo dacwad (i) ka dhan ah loo shaqeeyaha,wakiiladiisa ama saraakiisha u shaqaysa loo shaqeeyahan marka laga reebo shaqaalaha raba in loo ogolaado lacag ka baaqatay isagoo shaqada kaga maqnaa dhaawac gaaray ama (ii) mid kasoo horjeeda urur shaqaale noocan oo kale ah,ama urur shaqaalaha uu sii hoostago,ama xubnaha urur shaqaalahan ama saraakiishooda iyo wakiiladooda (iii) ama loo shaqeeye kale oo kasta ama urur shaqaale ,ama saraakiishooda ,ama wakiiladooda arinkasta oo la xidhiidha ama ka kacday ama hoos imanaysa sharciga xidhiidhka guud ee shaqaalaha ama sharcigan [cutub hoosaadka II ee cutubkan ama cutubkan]; iyo (B) arin kasta oo dacdaa taas oo larabo in urur shaqaale lagaga mamnuuco inuu bixiyo kharashka adeegyada sharciga iyadoo loo cuskanayo qodobka warbixinta maamulka shaqaalaha iyo soo

bandhigida ee 1959 [29 U.S.C. § 401 et seq.]; or (9) arinta ku saabsan lacagta ama waxyaalaha kale ee qiimaha leh ee loo shaqeeyuhu siinayo,maamulka gudiga wadajirka ah ee shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha,ee warshadeed,deegaan ama dhamaan meelkasta oo shirkadani ku taalo taas oo loo dhisay mid ama laba sababood oo ka mid ah sababaha lagu cadeeyay sharciga qaybtiisa5(b) ee sharciga wax wada qabsiga ee maamulka wadajirka ah ee shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha ee soo baxay 1978.

[qaybta. 302(c)(7) waxaa lagu daray waxaana la daabacay L. 91–86, Oct. 14, 1969, 83 Stat. 133; qaybta. 302(c)(8) waxaana la daabacay . L. 93–95, Aug. 15, 1973, 87 Stat. 314; Qaybta. 302(c)(9) waxaana la daabacay. L. 95–524, Oct. 27, 1978, 92 Stat. 2021; iyo qaybta. 302(c)(7) waxaa wax laga badalay lana daabacay . L. 101–273, Apr. 18, 1990, 104 Stat. 138.]

**(d) [Xadgudubyada iyo ciqaabahooda]** qofkasta oo si ula kac ah u jebiya qodob ka mid ah qodobada sharciga ee qaybtan kadibna lagu helo dembigaa wuxuu noqonayaan dambiile galay dembi darajo hoose ah waxaana lagu ganaaxayaa lacag aan ka badnayn $10,000 ama xabsi aan halsano ka badnayn ama labadaba.

**(e) [Awoodaha sharciga ah ee maxkamadaha]** maxkamadaha heer degmo ee maraykanka iyo maxkamadaha maraykanka ee ka jira maamulada madaxa banaan ee dawlada maraykanka hoos yimaada waa inay leeyihiin awood sharci ah oo ay waxku xukumaan sida uu sheegayo sharcigan qodobkiisa65aad ee sharciyada dawlada dhexe ee ku aadan kiisaska madaniga ah [qaybta 381 (oo dib looga noqday) ee ciwaanka 28] (kuwaas oo la xidhiidha ogaysiis la siiyey laba dhinac oo is haya) si ayna u dhicin in lagu xad gudbo sharciga qaybtan,iyadoon la tix gelinayn waxa uu sheegayo sharciga qaybtiisa7aad ee ciwaanka 15 iyo qaybta 52
Ee ciwaanka 29aad, ee sharciga maraykanka [ee ciwaankan] [kaasoo loo yaqaano “sharcigii Clayton”], iyo sharciga qaybtiisa101 ilaa 115 ee ciwaanka 29, ee sharciga maraykanka [cutubka 6aad ee ciwaankan] [kaasoo loo yaqaano “sharcigii Norris-LaGuardia”].

**(f) [Taariikhaha ay sharciyadani hirgelayaan]** sharciga qaybtiisan looma adeegsan karo, mana qabanayo qandaraas kasta oo hirgalay June 23, 1947, ilaa lagaadho wakhtiga qandaraas kani ku egyahay ama ilaa lagaaadho luulyo 1, 1948, hadba kii soo hormara.

**(g) [Qaaraamada la siinayo sanduuqa kaydka]** iyadoo la adeecayo xadidaadaha ku qoran sharci hoosaad kan(c)(5)(B) [ee qaybtan] marka u horaysa ee qaaraan la siinayo sanduuq kayd, kaas oo laga yaabo inuuna sharci ahayn,makhuseeyo qaaraamada la siiyey sanduuq noocan ah oo lagu dhisay heshiis lagu gaadhay gorgortan wadajir ah heshiis kaas oo lagaaray wixii ka horeeyay Janaayo 1, 1946, ama aan ka ahayn qayb hoosaadka(c)(5)(A) [ee qaybtan] kaasoo,loo fasirayo ama loo fahmayo mamnuucitaan la mamnuucayo qaaraamada lasiiyo sanduuqyada noocan ah hadii ay ka horeeyeen Janaayo 1, 1947, sanduuqa noocan ah waxaa la socda shuruudo ku saabsan sida loo isticmaalayo lacagaha loogu talagalay inuu qofku isticmaalo marka uu dalxiiska aadayo.

CUNA QABATAYMAHA IYO WAXYAALAHA KALE EE SHARCI DARADAA EE LASOCDA

**qaybta. 303. [§ 187.]** (a) Waa sharci daro sida sharcigani qabo keliya in urur shaqaale ay xubnihiisu u shaqeeyaan, shirkad ama hawlo kale oo taabanaya ganacsigu uu ka qayb qaato arimo la xidhiidha ama falal la cadeeyey inay yihiin ku xadgudub uu shaqaaluhu samaynayo sida uu dhigayo sharciga qabtiisa 8(b)(4) ee sharciga xidhiidhka guud ee shaqaalaha [qaybta 158(b)(4) ee ciwaankan].

(b) qofkasta oo ku dhaawacma ganacsi uu leeyahay ama hanti uu leeyahay dhexdeeda iyadoo sababtu tahay jebin uu jebiyey sharci hoosaad kan (a) [ee qaybtan]waxaa laga dacwayn karaa maxkamad kasta oo heer degmo oo dawlada dhexe ee maraykanku leedahay taas oo hoos

imanaysa xadidaaha iyo shuruudaha uu qabo sharciga qaybtiisa301[qaybta 185 ee ciwaankan] iyadoon la tixgelinayn qiimaha uu dhanyahay waxa laysku hayaa ama maxkamad kasta oo kale oo awoodeeda sharci ay hoos yimaadaan labada dhinac ee is hayaa isla markaana maxkamadu waa inay ka qaadaa magdhawga dhaawaca isaga soo gaadhay iyo lacagta dacwada ku baxdayba.
XADIDAADA QAADHAAMADA LASIIYO SIYAASIYIINTA

**Qybta. 304. waa laga noqday.**

[arag qaybta. 316 ee sharciga dawlada dhexe ee ku saabsan doorashooyinka ee soo baxday 1972, 2 U.S.C. § 441b.]

**qaybta. 305.[ § 188.] Shaqo joojinta shaqaalah dawlada. Waa laga noqday.**

[See 5 U.S.C. § 7311 and 18 U.S.C. § 1918.]

**ciwaanka IV**

[Ciwaanka29, Cutubka 7, Cutub hoosaadka V, ee sharciga maraykanka]

SAMAYNTA GUDI WADAJIR AH OO SOO DERSA DHIBAATOOYINKA YARYAR EE SAAMAYNTA KU LEH XIRIIRKA SAAXIIBTINIMADA AH EE SHAQAALAHA IYO LOO SHAQEEYAHA IYO WAX SOO SAARKA SHAQAALAHA

**qaybahan. 401–407. [§§ 191–197.]** waa laga saaray.

## SHARCIGA MAAMULKA XIRIIRKA GUUD EE SHAQAALAHA

**CIWAANKAV**

[Ciwaanka 29, Cutubka 7, Cutub hoosaadka I, ee sharciga maraykanka]

ERAY BIXIN(QEEXITAAN)

**qaybta. 501. [§ 142.]** marka la isticmaalo sharcigan [cutubka]—

(1) Erayga ah “warshado la xiriira ganacsiga” waxaa loo jeedaa warshad kasta ama ganacsi kasta oo khilaaf u dhaxeeya shaqaalaha iyo loo shaqeeyuhu uu dhibaato u geystay ama uu hor istaagay ganacsigii socday ama uu isku deyay inuu joojiyo habsami u socodka hawlaha ganacsiga (2) Erayga“shaqo joojin” waxaa ku jira oo uu koobayaa nooc kasta oo shaqo joojin ah oo shaqaale sameeyo (marka lagu daro shaqo joojin loo sameeyey dhamaad uu dhamaaday wakhtigii, heshiis gorgortan wadajir ah lagu gaadhay) iyo qorshe kasta oo lagu yaraynayo xawliga wax soo saarka ama qorshayaal kale oo shaqaaluhu ku hakad gelinayaan shaqada.

(3) Erayada ah “ganacsi,” “khilaaf shaqada iyo shaqaalaha,” “looshaqeeye,” “shaqaale,” “urur shaqaale ,” “wakiil,” “qof,” iyo “kor kala socde” waa inay leeyihiin macno lamid ah macnihii ay lahaayeen markii loo isticmaalayay sharciga xiriirka guud ee ururada shaqaalaha,mar hadii sharcigan wax laga badalay [cutub hoosaadka II ee cutubkan].

SHARCIGA BADBAADA SHAQAALAHA

Qaybta. 502. [§ 143.] [Xaaladaha sida aan caadiga ahayn khatarta u ah] Majiro wax sharcigan ka mid ah [cutubka] oo loo fasiran karo in qofka shaqaalaha ah shuruud looga dhigo inuu qabto shaqo ,ama adeeg kale oo uuna ogolayn sidoo kale majiro wax sharcigan ka mid ah oo [cutubka] loo fasiran karo in qofka shaqaalaha ah shaqadiisa looga eryi karo si sharci daro ah ,mana dhici karto in maxkamadi amar ku siiso qof shaqaale ah inuu qabto shaqo isagoon raali ka ahayn sidoo kale waxaan iyaduna sharci daro ahayn in qof shaqaale ah ama dad badan oo shaqaale ahi ay shaqadooda ka tagaan iyagoo sabab macquul ah uga tegaya sida hadii goobta shaqadu ay tahay mid khatar ah in laga shaqeeyo ,ama hadii shaqaaluhu go’aan sadaan inay shaqo joojin ay khatarta shaqada kaga cabanayaan ay sameeyaan iyagoo sharcigan raacaya. [cutubka].

KALA SAARIDA SHARCIYADA

Qaybta. 503. [§ 144.] hadii qayb kasta oo ka mid ah sharcigan [cutubka], ama ku fulinta sharciga noocan ah qof kasta ama xaalad kasta, loo arko inay tahay mid aan shaqaynayn inta sharcigan ka hadhay [cutubka], ama ku fulinta sharcigan ee qof kasta ama xaalad kasta, oo aan ka ahayn

kuwaa la sheegay inayna qabanayn, maaha inay saamayn ku yeelato, taas oo macnaheedu yahay waxaan ka ahayn waxa kor lagu soo sheegay.